# waaga cusub

Agoosto 1976 Sannadkii 4aad - L. 36 Wargeys bil walba soo baxa waxaana soo saara W.W. iyo Hannuuninta Ummadda ee J.D.S



# shirkii daarusalaam: shir guuleystay



# DHISMAHA DUGSIYADU WAA DHISMAHA AQOONTA



# FAALLO

# BARNAAMIJKA XISBIGA

## XEERAR QIIMO LEH EE XISBIGA

Caddadkan maanta ah ee waaga Cusub wuxuu si buuxda uga warramayaa barnaamijka xisbiga hantiwadaagga ah ee Kacaanka Soomaaliyeed, wuxuu kaloo si tifaftiran uga warramayaa hawlihii la qabtay intii uu Shirweynihii aasaaska Xisbigu socdey.

Mudidda tiirarka Xisbiga waxaa lagu dhaqaaqay markii la hubsaday in bisaylka garaadka Siyaasadeed ee dadweynaha Soomaalidu gaarey heer gacalka dadka Soomaaliyeed kalsami iyo bogaadin ku dhalinayaa heer aan yacyacood iyo dhinnaan looga baqayn barbaarintii Kacaanku ku hayey garaadka Siyaasiga ah ee dadweynaha tan iyo maalintii Kacaankaas guuleysan Kaahiisa la arkay.

Arintaas waxaa ka dhashay in la dareemay baahi deg-deg ah ee jideynaysa in udubka loo taago hab siyaasadeed waqtigaan aad ugu habboon.

Waxaan muran ka joogin haba yaraadee in arrinta meesha ugu weyni tahay sidii X.H.K.S. u qaban lahaa garka habkaas siyaasadeed la isuguna dubbaridi lahaa xiriiradiisa maamulka si la socota hadbo koridda xisbigu meeshay marayso.

Waxaa tilmaan ma doonta ah ee dhib yari lagu garan karaa, in xeerarka Xisbigani iyo tabihiisu ayan marna la mid noqon karin kuwii Xisbiyadii ka horreeyey.

Waxaa lama huraan ah in loo madxiyo loona sakimo xeerarka gudaha ee Xisbiga si geedigiisa hanan karta si baan siin karta meeluhuu ka tabaalaysan yahoo dhan.

Taasina waxay si buuxda uga muuqataa barnaamijka Xisbiga iyo dastuurkiisa Arrintaas waxaa si habboon u jeex jeexay uguna baaraan dagey Hay'adaha Xisbiga iyo hoggaamadiisoo dhan.

Waxyaabahaas oo dhami waxay Caddaynayaan in Kacaanku ku dhigay Faraha hub karti leh oo uu jidkiisa ku fasho ujeeddooyinkiisa aayaha lehna ku gaari karo Xisbigana himilooyinkiisa iyo tabahiisa iyo abuurtiisuba halkaas ay si ciiryaamo aayan ka sokayn uga muuqataa.

Barnaamijkka guud ee Xisbiga iyo dastuurkiisa iyo khudbaddii dheerayd ee uu Madaxweynaha Ummaddu jeediyey waxay koobayaan dhammaanba khayrka dadka Soomaaliyeed meel kasta ha joogee Jamhuuriyadda gudaheeda kuwa ku jira iyo gacanta gumeysiga weli ku dembeeyaba, ka sugayaan Xisbiga.

Saddexdaa tiir ee kor ku xusani, barnaamijka, dastuurka, iyo khudbada Xoghayaha guud ee X.H.K.S, waxay dhidibada u

# XHKS WAA HORSEEDIHII UMMADDA

## HAB WACAN EE SIYAASADEED

aasayaan, habka madaxnimada xisbiga ee fafinta dadweynaha.

Hawlaha Xisbiga waxaa loo sar jaray si la socota ujeeddooyinkiisa Kacaanimo, ilaalinaysana isu ekaanta iyo isku habnimada ururadiisa.

Habkeenna Siyaasadeed ma aha mid unna gaarsiinaya ujeeddooyinkeenna ee wuxuu kaloo yahay nuur ayaga ka soo baxaya, sida uusan u ahayn tabta ugu wanaagsan ee aan ku dheerayn karro tilaabada horumarkeenna, laakin uu u yahay mid noo suurowsiineysa isbeddel gudaha ah.

Markaa waxaan oran karnaa habkani waa mid dhalinaya xilli ama hawo suura gelineysa abuuridda Ummad yar oo hufan tilmaanna u noqon karta Ummadda weyn ee sare ee aan raadineyno meel kastoo laga eegaba.

Halkani waa hubka guud ee Kacaanku ku xalayo wasaqdii ka dhiintay talisyadii aafeysnaa ee hore.

Habkani wuxuu noo suura gelinayaa inaan isu eegno sidaan shalay ahayn iyo foolxumooyinkii bulshadeenna ka muuqdey intii ka horreysey Kacaankii 21kii Oktoobar — inaan isu eegno intaas iyo heerka maanta aan gaarnay.

Waxaa hubaal ah in muuqashada kala duwanaanta labadaa nololood ay noo fududaynayso qaadidda tilaabada kama dembaysta ah ee lagu tirtirayo raadadkii xumaa ee musuqmaasuqa sida ay noogu sahleyso in xargaha loo furo awoodda dadweynaha ku kaydsan ee aan la koobi karin.

Si aannu taa ugu guuleysano waa in horta la helaa jid ka leexasha la'aan taasoo ah heerka ugu sarreeya ee madax bannaanida xagga fakarka, maxaa yeelay taa waxaa macnahoodu yahay in tafkiir kaagoo loo kal baxan yahay iyo weyneyntiisu waa shayga qofka gaarsiiya heerka Cabsi la'aanta iyo dhibaato garaysiga.

Fakarkaasi waa inuu yahay mid miro la taaban karo leh kana muuqda qofka Xisbiga ka tirsan hawlahiisa iyo dhaqankiisa maalin walba.

Leexasha la'aantu qofkastoo Xisbiga ku jira waxay faraysaa inuu garaysto in loo hoggaansamo had iyo jeer talada dhanka badan.

Leexasha la'aantu waxay leedahay «Fuli kana hadal».

Taasi waa qiyaasta Cilmiga ah ee go'aanka Dimoqraadiga ah, waana kan dadweynaha iyo hoggaanka Sare.

Saas darteed ayaan qofkasta ee Xisbiga ka tirsan waxaa ku jidowdey inuusan ka leexan dhabbaha inta badan ee weligiiba hayo dafacana.

# BARNAAMIJKA XISBIGA HANTIWADAAGGA KACAANKA SOOMAALIYEED

*Bulshada aadamigu waxay foodda la gashay rubucii u dambeeyey ee qarnigii labaatanaad, markastana waxay ku taameysey iney gaarto bulsho qof walba u sugaysa nolol u qalanta d a d n i m a d i i s a isla markaana u horseedaysa ka hortagga iyo burburinta midiidinnimada, gumeysiga iyo isku kornoolaadka. Loolankaas muddada dheer socdey wuxuu maanta soo gaadhey heer la yiqiinsaday in wax waliba ku xiranyihiin habka maamudka iyo kooxda u talisa tacabka x o o g s a t a d a bulsha kastaa soo saarto. Haddii in badan taliskaas ay haysteen dabaqado hantigoosi iyo hantibursi ku baarbaaray, oo ayaga oo innaba u aabayeeleyn dano ka duwan kuwood khaaska ah, ay u bareereen iney kadeed iyo addoonsi heerar badan soo maray ku hayaan dabaqaadkii ka koobnaa shaqaalaha iyo wixii danyar ahaa, ayaa la gaarey marxalad wacyiga midnimada iyo gilgilashada xoogsatadu ayan oggoleyn in habkii hore uu meel maro, oo dhidibkooda kooxo kale iyo dabaqado kale ku intifaacaan. Arrintaasi waxay keentay in maanta la joogo adduunka oo guud ahaan u kala bayray laba waddo: ta hore ee hantibursiga, imberyaaliyadda, gumeysiga iyo dib-u-socodku ku socdaan, iyo tan cusub ee hantiwadaagga oo ay ku socdaan beesha dawladaha hantiwadaagga ah, iyo dhaqdhaqaaqa shaqaalaha dalalka hantigoosadka ee u dagaallamaaya daafacadda danaha xoogsatada.*

*Haddaba dadyowga dunida saddexaad, oo intooda badani kol dhow ka madax-bannaanaadeen gumeysi, hase yeeshee gumaysi jaad cusub ihi kor taaganyahay, oo ah ku dhaqaale, ku dhaqan iyo ku aqooneed, waddaadee bay dhab ahaan ku xoroobi karaan? Sideebay hor-u-mar degdeg ah oo isla markaasna u danaynaya xoogsatada tacabka soo saarta, dhowrayana xuquuqda aadamiga oo uu leeyahay ruux kasta oo bulshada ka mid ah, lugu gaari karaan? Haddii si fiican loo darso taariikhda iskahorimaadka dabaqadaha mujtimaca kastaa ka koobnaa, iyo nolosha maanta taalla dunida saddexaad, waxaa bareer u muuqanaya inay lagama maarmaan ku tahay ambaqaadka waddada hantiwadaagga.*

*Doorashadaas taariikhiga ahi ma aha mid isaga imaanaysa ku dayasho iyo dheeldheel, ee waa mid lamahuraan ah, kuna hirgeleysa dagaal kharaar iyo adkeysin badan oo loo yeesho weerarka falan ee dib-u-socodka iyo imberyaaliyaddu ay dalalkaas ku qaadayaan. Dagaal ladaas jaadka kala duwan ah waxaa ka mid ahaa in ay jahawareeriyaan madaxda iyo dadyowga waddammadaas, ayaga oo moodsiinaya, markii ay si kale uga caal waayeen, in hantiwadaagyo kala duwan jiraa, qolo walibani keeda khaaska ah ku meel marti karto.*

*Sida uu marar badan ugu dhawaaqay Xoghayaha Guud ee XHK Soomaaliyeed Hantiwadaagu ma aha mid midabyo badan, ee waa mid qura ee cilmi ah, waana halkii ugu sarreeysey ee fikradda bani-aadamku gartay kuna dheehan waayo-aragnimada hor-u-mar bulshada aadamiga oo dhan.*

*Hantiwadaagga cilmiga ku dhisan wuxuu leeyahay qawaaniintiisa u gaarka ah ee mowduuciga ah, kuwaas*

*oo lagu hirgelin karo dal iyo qaarad walba -Shardi waxaa ah in dadka hantiwadaagga ahi gartaan, awoodna u yeeshaan isticmaalka iyo fulinta qawaaniintaas, iyaga oo marksta tixgelinaya waxyaabaha u gaarka ah dal walba. Waddammada bulshadooda ku dhisay mabaadii'da hantiwadaagga, ayna ku xididaysteen, waxay si cad u muujiyeen in ayan muran geli karin horreynta hantiwadaaggu, wanaagsanaanta iyo gacansarreynta uu ka leeyahay habka hantigoosiga.*

*Maadaama ay arrintaasu tusaale iyo tilmaan u noqonkarto dalka soo koraya, imberyaaliyadda adduunku waxay mar walba isku deyeysaa iney ka hor-tagto, ayada oo xoojinaysa isku-dulnoolaadka, dabaridda dhaqaalaha iyo xuquuda dimoqraadiga ah ee dalalkaas, meel walbana ka aloosaysa qas iyo weerar.*

*Haddii loo dhabbogalo siyaasadda adduunka maanta ka taagan waxaa muuqanaysa inaan dabeecadda imberyaaliyadda, oo ah dib-u-socodnimo iyo duullaan dadyowga itaalka daran lugu qaado, in ayan marna isbeddelin, bal waxaaba la oran karaa waxay ku hammiyaysaa inay mar labaad soo ceshato heybaddii iyo gacan - sarrayntii ay mar dunida ku lahaan jirta, waxaana u daliilahfargelinta joogtada ah ee arrimaha dowladaha soo koraya iyo la safadka haraaga gumeysiga iyo midabtakoorka weli meelaha qaarkood ku dambeeya. Waxyaabaha faceennu maalin walba goob-joogga u yahay, oo ay ka mid yihiin inqilaabyada dibu-socodka ah oo la abaabulo, ciidammada calooshooda u shaqaysta oo dhuuniraaca ah oo lagu dalbbado waddammada heeryada gumeysiga iska rogaya, laaluushka loola bareeraya madaxda iyo maamulka wadammada soo koraya, shirqoollada dhaqaalahooda iyo boobidda hantidooda, waxay wada calaamad u yihiin dhar-dhigashada iyo mintidnimada hantigoosadka iyo imberyaaliyaddu ay isla soo taageen, ayaga oo filaya iney joogaan goobtii ugu dambeysey ee lagu jebin lahaa, Ummadaha adduunkuna ay kadeedkooda uga xoroobi lahaayeen.*

## *SARAKACII AFRIKA*

*Qaarada Afrika waxay ka mid tahay goobaha isticmaarku qarniyadaan dambe aad u siliciyey raakiisuna ku dambeeyo, walina inuu ku roogal celiyo u hanqaltaagayo.*

*Ha ahaatee dadweynaha qaaraddaasu wuxuu soo hooyeey, tan iyo dagaalkii labaad kaddib, guulo waaweyn, oo runtii nin kastaba dareensiiyeey xooga iyo itaalka ku dahsoonaa.*

*Haddii tusaalo loo baahdo waxaa loo soo qaadi karaa arimaha soo socda: Nnina ma moog in sanndkii 1960kii loo bixiyey« Snnadkii Afrika» ayada oo aad mooddid in loo qaadan la,yahay inay durba qaaradda ka dhex dhashaan 17 dawladood oo xora; maantana waxaa gobannimo iyo madaxbanaani haysta 47 dowladood. Libtaa weyn ee ay Afrika maanta gaartey waxay ku timid ayada oo dadweynaha Afrika uu ka baraarugay cadaadiska, midiidinnimada iyo quursiga uu muddadaa dheer ku noolaa, saboolnimada la baday iyo waxa aayihiisa dambe lala damacsanaa, mar nabana isxaan iyo baryo uusan ku helayn. Sarkaca ay Afrika u sarakacday gobannimadeeda waxay gacan hiila u geysatey dadyowgii ku hoos jireye dowladihii gumeysanaayey qudhoodu inay ka xoroobaan fashistanimada iyo deglaalooriyaddii gobanimada waxay kale oo ku timid isu-xiiska iyo isku duubnida gobollada kala geddisan ee qaaradda Afrika, ayaga oo si sax ah u arkaaya in aayatiinkoodu isku meel ku dhammaanayo, isutaggooduna uu ka dhigayo xubin ku adag cadow kasta inuu liqo. Taasi waxay keentay dhalashada ururka Midowga Afrika (O.A.U.) oo heer sare gaarsiisey halgankka ay Ummadaha Afrika ugu jiraan xorriyadooda hor-umarka dhaqaalahooda, cilmiga, farsamada iyo dhaqankooda, wuxuuna isu duwey xoogag kala firisanaa oo maanta meel uga soo wada jeeda weerarka iyo dhagata gumeesiga iyo imberyaaliyadda.*

*Waxaa kale oo qayb weyn ka qaatay -madaxbanxaanida qaaradda Afrika xoogga lahayd oo hub farsamo iyo dhaqaaleba, oo ay dalalka hantiwadaaggu taageeraan waddammada halgamayey. Iayada oo ay hoggaaminayso aragtida cilmiga ah ee isbeddelka bulshadu, dawladaha hantiwadaaggu waxay si isdabajoog ah in badan kaalmo qaayo leh u fidiyeen xoogagga gobannimadoonka iyo dawladaha markaa dhashay, iyaga oo cuskanay mabda'a xaqa ah oo ummad walba siinaya ka taliska aayaheeda dambe.*

*Haddaba waxaa meeshan xus uga baahan: madaxbansaanidii halgankaas dheer iyo dhibtaas badan laga soo maray, maxay Afrikaankii ka dheefeen? Sidii ugu habboonayd ma uga faa'iideysteen? Waxaa la oran karaa ma ayan suuragelin in dadweynaha Afrika ay qummaati u maalaan libtii ay soo hooyeen. Taasna waxaa ugu wacan arrimo badan, aanse ka soo qaadno jahawareerka ku dhacay wddammo badan xorriyadda kaddib taasoo, keentay inay madaxdii hoggaanka haysay ka bayreen danihii dadweynaha, kuna xirmay gumeystihii shalay iska kacshay.*

*Jahawareerkaas waxaa inta badan ugu wacnaa ayada oo aan si fiican loo darsin bulshada, xiriirka tacabka ka dhexeeya, saameynta qotadheer ee hiddaha iyo dhaqankii hore leeyihiin, iyo nolosha fudud oo*

*dhayalka ah oo gumeystaha cusbi hadba meel ka bidhaaminayo oo lagu qamaamay.*

*Haddii hor iyo abbaataba la garawsan lahaa in dadaalku uusan ku ekeyn maalin gobannimada la hanto ee mid socda yahay ilaa la baaba'sho isku-dulnoolaadka, saldhig maaddiyana loo yeelo hor umarka dhaqaala xaqiijiyana bulsho wax walba wada' tacbaysa, si habsami iyo caddaalad ahna waxa ku qaybsanaysa, iskuna maamusha dimuqraadinima iyo dhawridda xuquuqda banii'aadamiga ee asaasiga ah, jirrabaad badan oo foodda saarayso ayey ka samatabixi lahayd.*

*Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya waxay ka mid tahay dalalkii Afrikaankaa ahaa ee 1960 gaarey xorriyadooda. Haddana waxaan la moogayn dagaalkii dheeraa ee shacbiweynaha Soomaaliyeed uu u galay madaxbannaanidiisa.*

*Haddana halgankaas dheeraa intiisa dambe ka soo qaadno, waxaa nooga filan tilmaan dagaalkii Sayid Maxamede Cabdulle Xasan, uu ku xigey kii axsaabtii gobannimadoonka ee dagaalkii II. ee adduunweynaha dhexdiisa bilaabmay.*

*Ujeeddooyinka dagaalladaas oo dhani waxay ahaayeen in:*

*a) Gumeysiga laga xoroobo,*
*b) Ummadda Soomaalida la mideeyo,*
*t) laga gudbo haraaga dhaqankii xumaa iyo tiirarkii dhismaha bulshadii qabiilka reer reerka iyo gobolaysiga ku taagnaa, loona gudbo dawladdimoqraadi ah oo dadka oo dhan u dhaxaysa.*

*Ugu dambeystii laba ka mid ah Degmooyinkii Soomaali weyn degganayd oo gumeysigu kala googooyey, oo kala ooday ayaa 1960 xoroobey, iskuna darsamay, ayaga oo halkaas ka abuuray Jamhuuriyadda Soomaaliya.*

*Ayada lafteedu waxay gacanta u gashay koox qabsatay hoggaankii waddanka xorriyadda kaddib, durbana u rogmay sida waddammo badan oo Afrika daneystayaal dib-usocod ah, si walbana ugu xiran xeelaha dheer ee imberyaaliyaddu adduunka ku baahisey. Arrintaasi waxay keentay inay suurogeli weydey xaqiijinta midnimada ummadda Soomaaliyeed iyo inay Soomaaliya ka go'doontay dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka iyo isbahaysiga dawladaha iyo dadyowga ay isku danta yihiin.*

*Iyagoo isticmaalaya wax «dimuqraadiyada» ku sheega, run ahaantiina ah koox burjuwaasi iyo dibusocodka ah ee maamulka siyaasiga ee dalkeenna ku xiraaya imberyaaliyadda, kuwii xukunka haystay waxay ku soo dhuman jireen Baarlamaankii, si ay u gaaraan danahooda gaar ahaaneed.*

*Farabadnidii axsaabtii kala duwanaa waxay dhalisay khalkhal siyaasi ah, isla markaana waxay jahawareerisey dadkii, oo si aad ah looga fogeeyey inay ka qayb qaataan go'aannada saameeya arrimaha la xiriira noloshooda. Sidaas awgeed baa doorashadii dhacday 1969kii, ay uga qayb qaateen 88 Xisbi oo ku dhaqmayey ama ku abuurmay si qabyaalad, musuqmaasuq iyo gobolaysi ah, qaarkoodna u qabbanayeen gumeysiga. Madaxda axsaabtaasi waxay daba joogeen una dagaallamayeen inay gaaraan himilooyinkoodii ku dhisnayd keli-noolaanshaha xaasidnimada iyo meel ku gaarka, ee aanxiriir la lahayn danaha xoogsatada, iyo dadweynaha midna.*

*Kooxahaas dibusocodka ahaa waxay dhaceen oo boobeen ummaddoodii iyo barwaaqadii dalkooda, waxay urursadeenna xoolihii dadweynaha. Sidaas bay dibusocodkii ku hakiyeen horukacii dadweynaha Soomaaliyeed xagga bulshad iyo dhaqaalaha, isla markaana si adag ugu xireen hantigoosadka dibedda. Waxaa ka mid ahaa xadgudubkii rajaciyada, inay ku kici jireen tallaabooyin aad iyo aad u fool xun, naxariisna aan lahayn oo mararka qaar gaadhsiisnaa inaynan dan ka gelin daadashada dhiigga. Ummadda Soomaaliyeed si naxariis darro ah ayey qurbaan ugu noqotay xuquuqdarradii, shaqali'idii, faqrigii iyo cudurkii muddada badan dalka yiiley. Dhibaatooyinkaasina waxay u geeyeen inay ka hortagto oo dagaal la gasho taliskii rajaciga ahaa.*

*«Mudaaharaadkii iyo kicitaankii 1972, 1967 iyo 1968», waxay si buuxda uga marag kacayeen bislaanshaha garaadka siyaasiga ee dadweynaha isla markaana waxay u digayeen dibu-socodka. Hase yeeshee dhaqdhaqaaqyadaasu ma ahayn kuwo isku maamul qudha lahaa, abaabulnaa, isku duubnaan. Taas oo dib u riddey iska horimaadka kama dambays ah.*

*Ciidammada Qalabka Sida, oo ay hoggaaminayaan Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre iyo Saraakiil horusocod ah, ayaa iyadoo dalku khalkhalkaas iyo ciriirigaas ku jiro, samato-bixiyeen, una soo hinqaday daafaca Ummadda Soomaaliyeed, curiyeyna 21kii Oktoobar 1969kii, Kacaankii cabbirayey danaha dadweynaha.*

*Xilkaas iyo taliska lala wareegay, ma ahayn mid dan gaar ah oo Ciidammada loogu qabaanayey, ee wuxuu ahaa mid Ciidammadu ku gudanayeen waajib culus oo saarnaa, ay horena ballanqaadeen, kaa oo ahaa iney waddanka hooyana daafacaan, danaha dadweynahana ka ilaashaan boobe iyo dhagarqabe ka yimid dibedda ama ku jira gudaha. Ha ahaatee Ciidammadii iyo xoogaggii kala ee bulshada oo taageerayey waxaa*

*isla markiiba u muuqatay in lagu maamulo Kacaanka hab dimoqraadi ah, xiriirkii bulshada dhexyiilna la rogo ilaa la gaarsiiyo heer qof walbaabo helo. Erayga dheeraadka ah oo ku biiray magacii hore ee Jamhuuriyadda Soomaaliya oo «dimoqraadiga» ah wuxuu tilmaamayay ujeeddadaas.*

*Hay'addii ka dhalatay Kacaanka oo ilaa maanta xilka iska saartay hoggaaminta dalka waxay ahayd «Golaha Srae ee Kacaanka» oo Guddoomiye u doortay Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre Golaha Sare ee Kacaanku wuxuu buriyey dustuurkii iyo wixii xeerar ka horreeyey oo aan Kacaanka ujeeddooyinkiisa la socon karin, kuwaas oo ku xusnaa xaashadii Koowaad oo uu soo saaro, ayna ka mid ahaayeen in «Soomaaliya laga dhiso bulsho cusub oo ku taagan asaasna u yihiin caddaalad, shaqo iyo sinnaan ijtimaaci ah», isla markiiba waxaa la dhisay habmaamul cusub, dowlad iyo hay'ada kala duwan oo Kacaan ah, dadweynihiina waxaa loogu baaqay inuu gacanta ku dhigo aayihiisa Tallaabooyinkaa oo dhan waxaa loogala jeeday:*

*a) in haraati kulul dib-u-socodka looga durjiyo maamulka danaha dadweynaha.*
*b) in la abuuro saldhiggii maaddiga ahaa oo horumarka dhaqaalaha iyo bulshadaba.*
*t) in la unko dhismaha dheer ee bulsho hantiwadaag ah.*
*i) in la barbaariyo hawlkareenno wacyi siyaasi iyo aqoon farsamadaba leh oo taabbageliya himilooyinka Kacaanku u dhashay.*

*Saas awgeed baa waxaa la galay marxalo aad u adag, oo la dhihi karo «kala guur», oo dib-u-socod iyo danaystihii gudaha iyo imberyaaliyadda caalamiga ahi ayan xoog iyo xeel midna kaydsan si ay ku burburiyaan Kacaanka ay is-af-garad iyo dibecsanaan midna ka waayeen.*

*Ballankii hoggaanka Kacaanka qaadey oo ahaa in waddanka la ambaqaadsiiyo wadda cad oo xaqiijinaysa danaha dadweynaha iyo xoogsatada Soomaaliyeed waxaa lagu fuliyey xaashidii labaad oo lagu caddeeyey in waddada keli ah lagu hirgelin karo danaha iyo himilooyinkaas ay tahay midda hantiwadaagga. Waxa bar-bar yaalla waa uun tan hantigoosiga, oo ku xiran imberyaaliyadda, ilaa haddana aan la arag fulisey hor-u-mar xididdo ku leh danaha dadweynaha.*

*Ayadoo sal ooga dhigay mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, laga faa'iideysanayo waayo aargnimada dhismaha hantiwadaagga ee beesha dawladaha hantiwadaaggga, Golaha Sare ee Kacaanka ee JDS wuxuu si hubaal ah dalka ugu hoggaaminayay jidkii la doortay. Tan iyo intii uu curtay Kacaanku, dalka waxaa laga qaaday tallaabooyinkii saldhigga u ahaa dhismaha hantiwadaagga: qaramaynta baananka, sharikada badan,wershadaha, midaynta habka maaliyadda oo qudha, la wareegga iyo xoojinta kontoroolka dawladda dhinaca ganacsiga d i b e d d a iyo g u d a h a, abuuridda iyo xoojinta waxyaha dawladaha ee warshadaha iyo beeraha. Qorshihii horumarinta ee saddexda sano (1971 - 1974) iyo shanta sano (1974 -1978) waxay caddeeyeen baahida loo qabo in dhaqaalaha dalka uu yeesho asaas qorshe, waxay dalka u ifiyeen waayo-argnimada qorshaha cilmiga ku dhisan, ilaalinta iyo hoggaaminta dhaqaalaha waddaniga ah. Markii la hirgelinaayey qorshahaas waxaa abuurmay saldhiggii horukaca degdegga ah ee xubnaha dhaqaalaha Ummadda ee waaweynaa - Xoolaha, beeraha, wershado cusub ee ka dhashay dalka, waddooyinka, dugsiyada, cusbitaallada iwm. Barnaamijka cuntada degdeg «Karaash Brogaram» kaalin weyn oo qiimo leh ayuu ka qaatay kor u dhigidda iyo xoojinta wax soo saaridda tacabka beeraha, halkaas oo si joogta ah looga tacabo dhul cusub loogu beerana waxayaalaha dalka looga baahan yahay.*

*Qaanuunkii la guddoonshey 1973dii oo ahaa abuuridda iskaashatooyinka xagga beeraha, kalluumaysiga farshaxannada xubnaha kale ee dhaqaalaha, barnaamijkii taariikhiga ahaa ee bilaabmay 1975tii ee ahaa dadbaadinta, raridda iyo dejinta dadka reer guuraaga, waxay aayaha dambe ee dalka Soomaaliyeed u leeyihiin qiimo weyn oo aan marnaba la illoobi karayn.*

*Arrintaas lama filaanka ah waxay dhacday iyadoo Kacaanku meel dhigtay in kolleyba reer miyiga, oo ummadda Soomaaliyeed u badantahay, loo qorsheeyo dejin, muddo kastaba ha qaadatee.*
*dhisan.*

*Sida la ogsoonyahay waddanka Soomaaliyeed waxa ku jira khayraad badan, Beri ama Bad ha ahaatee dad garab-rarato ah oo maalin la-nool ahna uma suuragelayso inay la soo baxaan. Dhinaca kale, looma deyn karo dadweynahaas Miyiga ku baahsan xannaano la'aan, aqoon daro iyo ciidan xumo.*

*Saas awgeed, bey Kacaanka ugu muuqatay inay lagama maarmaan tahay u tabaabushaysiga iyo qorshaynta isku xiridda dadka iyo dhulka, dadka iyo Badda.*

*Inkastoo abaarihii waddanka dhaawac weyn u geysteen haddana badbaadada dadka ka sokow waxa si sax ah loogu abbaaray bilowga fulinta barnaamijkaas, maantana waxa la oran karaa heer fiican baa laga gaaray.*

*H i r g e l i n t a iyo fulinta tallaabooyinkaasi waxay waxtar u leeyihiin in dadka la xasiliyo oy negaadaan iyo in dalku ka haqab beelo cuntada iyo miraha beeraha, isla markaana si degdeg ah saldhig adag*

loogu abuuro oo awood loogu helo horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada hantiwadaagga ah.

Sannadihii dambe dalkeenna waxaa ka hirgalay isbeddello Kacaan ah oo dhinaca siyaasadda, bulshada iyo dhaqanka ka taabanaya Bulshada. Waxaa lagu dhawaaqay lana hirgeliyey sharciyo madani ah oo cusub kuna saabsan shaqada, qoyska, Howlqabka, lacag - la'aanta daaweynta, tacliinta khasabka Dugsiyada dhexe. Tallaabooyin lixaad leh ayaa laga qaaday dalka si kor loogu dhigo heerka aqoonta, hiddaha dhaqanka iyo suugaanta ee dadka.

Qoriddii af Soomaaligu iyo ololayaashi la xiriirey ee uu ka mid ahaa Ololihii Cidhibtiridda aqoon darrida waxay ahaayeen tallaabooyin taariikhi ah oo waxtar u ah dhismaha hantiwadaagga, waayo hantiwadaaggu wuxuu ka taabbogalaa bulsho dad waxyaqaan, tacliin iyo biseyl siyaasadeed mugdiga iyo khuraafaadku meel ka helin.

Arrintaasi waxay keentay in dadweynaha lagu baahiyo, Miyi iyo Magaalaba, tacliin degdeg ah oo aqoon guud iyo farsamaba leh. Waxay kaloo si toos ah waxtar ugu yeelatay kor u qaadidda heerka caafimaadka, dhaqanka iyo is-dhexgalka bulshada, isla markaas waxa suuragalay qiimo leh xagga baaridda iyo xagga cilmiyeyntaba iyo manhajkii oo lagu habeeyo degaanka Soomaaliyeed.

Inkastoo Ololahaas lagu jiray haddana looma daymo la'ayn tacliinta sare, oo waxaa abuurmay Jaamacadda Qaranka iyo laamaheeda kala duwan . Taas oo Waddanka ka kaaftoomisay tacliin-raadiskii dibedda.

Waxa kaloo suuragalay taabbagelinta nidaamka dugsiyada lagu galo iyo kan looga baxo iyo abaabulidda habka «Hawsha Qaranka» looga qayb geliyo dhallin fara badan oo halkaas gacan weyn ka geysta waxna ka barta maamulka waddanka intayan tacliinta sare u gudbin.

Sidaas awgeed waa la qiri karaa in Golaha Sare ee Kacaanka, ee uu hoggaaminaayo Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre uu si adag oo cad u hayey jidka horukaca ee u taagaya tiirar dimuqraadi ah bulshada cusub.

Guddiyada Shaqaalaha ee ka abuurmay warshadaha iyo hay'adaha dawladda waxay si kacaannimo ah u kormeeraan sida loo fuliyo qawaaniinta, waxay gacan ka geystaan sida kor loogu qaadi lahaa tacabka warshadaha iyo awoodda wax soo saaridda, waxay heegan u yihiin daafaca danaha Ummadda. Guddiyada shaqaaluhu si qumman bay u fuliyaan tusaaladii Jaalle Siyaad ee ahayd, in waqtiga dhismaha hantiwadaagga dabaqadda shaqaaluhu ay la yeelato xiriir cusub nolosha oo ka duwan kii hore ee aragtida gaabnaa, (danta degdegga ah ee shaqaalaha waa inay u dagaalantaa isbeddelka bulshada xagga maadiga ah iyo macnawigaba.

Arrinta weyn ee la xiriirta nolosha siyaasiga ee dalka waxay tahay in 1972kii la abuuray guddiyada Kacaanka ee Gobollada, Degmooyinka iyo Xaafadaha ee ay ku jiraan, sidaa kasakow wakiillada ciiddammada iyo maamulka dawladda dhexe, dad meselaaya xoogsatada. Guddiyada Kacaanka waa tallaabo qiimo leh, waxtarna u leh horukaca dimoqraadiyada hantiwadaagga ah iyo xaqiijinta xukunka dadweynaha. Tallaabadaas waxaa wehelisey in Kacaankii Oktoobar uu barbaariyey. awoodna siiyey xoogsatada Soomaaliyeed si firfircooni ah uga qayb qaataan nolosha dhaqaalaha iyo siyaasadda bulshada.

Waa markii ugu horreysay ee taariikhda dalkeenna ee dadweynahu si dhab ah uga qayb qaadanayo dhismaha dalka iyo maamulka, taas oo adkaysay xiriirka iyo kalsoonida madaxda iyo dadweynaha. Taasna waxan u daliil ah sida weyn ee dadweynuhu uga qayb qaaatay mashaariicda iyo tallaabooyinka waddaniga ah ee ay ka mid ahaayeen Ololaha Ciribtirka aqoondarrida, barashada mabaadii'da hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, iskaa wax u qabso, bacaad celinta iwm.

Xiriirka adag ee qotada dheer oo ka dhexeeya madaxda JDS iyo dadweynaha Soomaaliyeed waxaa kaalin weyn ka qaatay Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada GSK, Xafiisku wuxuu abaabulay, kiciyeyna dadweynaha, wuxuu gutay waajibaadka saameeya barbaarinta dadka xagga siyaasadda iyo mabaadii'da wuxuu macneeyay, sharxayna dulucda siyaasadda gudaha iyo dibedda ee dalka, iyo qawaaniinta hantiwadaagga cilmiga ku

Ciidammada Qalabka Sida oo ka soo dhexbaxay kana mid ah dadweynaha Soomaaliyeed, kaalin horseed ah bay ka qaateen dhismaha nolosha dalkeenna. Iyagoo dareemaaya danaha dadkooda, kana wakiila, bay diyaariyeen noloshana ku xaqiijiyeen Kacaankii Oktoobar, maantana si feejignaana bay u ilaalinayaan mirihiisa, kuna abuurayaan dalka nabadgelyo iyo xasillooni qayb laxaad lahna ka qaadanayaan dhismha bulshada cusub.

Kacaanka ka hor nabad iyo xasilooni midna ma oollin. Waxaa jirey qas, dil, dhac iyo aamindarro uu sabab u ahaa waaqicii bulshadeed ee dalka yilley. Si xididdada loogu siibo dhibaatooyinkaasi Kacaanku wuxuu ka qaaday tallaabooyin beddelay wejigii abniga iyo caddaaladdaba. Ka sokow xiriir bulshadeedka cusub ee abuurmay waxaa dib loo habeeyey sharciyadii hore waxaa la soo saaray xeerar waafajisan jidka siyaasiga ee la qaaday. Si loo adkeeyo amniga iyo caddaaladda waxaa lagama maarmaan ah in kor loo dhigo heerka garaadka siyaasiga ah ee dadweynaha. Guulaha iyo li-

*baha Kacaanku soo hooyey sida qudha ee lagu ilaalin karaa, daafaci karaana waa isxilqaanka iyo ka qayb galka tooska ah ee xoogsatada.*

*Dhisidda iyo barbaarinta bulshada cusub ee dal keenna ma aha mid aan lagala kulmin dhibaatooyin.*

*Dadka Soomaaliyeed waxay soomareen tijaabooyin adadag markay halganka iyo dagaalka kula jireen dhibaatooyinka dhaqaalaha iyo abaarihii, cudarrada faafa iyo duufaannadii muddada badan isdaba taxnaa. Jidkaas oo qura bay hore ugu uurto gashay, imminka na ugu suurto geleysaa in lagaga gudbo adkaysiga iyo is-hortagga waalida ah ee dibusocodka iyo kacaan diidka. Si aan heshiis lahayn kula dagaallamayaan cadowga bulshada Soomaaliyeed iyo cadowga Kacaanka ee koowaad, kaasoo ah Qabiil. Ka saaridda Qabiilka maskaxda dadka waa waajibka u weyn ee Kacaanka. Haddii aan si fiican oo hagaagsan arrintaas loo daaweyn way adag tahay sida lagu gaaraa midnimo buuxda iyo horukac bulshannimo. Iyagoo ka raja qaba in ay dalka ku soo celiyaan habkii maamulka ee hore, xoogagga dibusocodka waxay is-hortaagayaan horumarka iyo horukaca dalka, si cad iyo si qarsoodi ah bay isu hortagaan heerarka iyo go'aannada taliska Kacaanka, waxay abuuraan dhibaatooyin siyaasadeed iyo dhaqaaleed, dadkana waxa yku dhex faafiyaan been iyo hadallo aan asaas lahayn, waxay ku andacoodaan in ayan jirin nidaam bulshadeed. Dibusocodka had iyo jeer waxay saadiyaan lagama maarmaanka jabka nidaamka Kacaanka ah.*

*Hase yeeshee kuma guuleystan oo waxay ku hoobtaan tallaabooyinkoodaasi wax kasta oo dib-usocodka ah buu u sii xoogeysanayaa, awood iyo kartina u sii yeelanayaa, taas oo xooggiisu ku jiro sida adag ee uu ugu xiran yahay dadka iyo sifada dadweynanimada ah midaamka kacaanka ahi si joogta ah ee sida qotada dheer ugu dheehan.*

*Arritnaasu waxay si cad u muuqatay markii dhul iyo dad badan oo dalka ahi halis u noqdeen abaaro, abaarhaas oo waxyeellooyin iyo dhibaatooyin waaweyn u gaystay Gobollo iyo Degmooyin badan, khasaaro doorana u geystay dhaqaalaha dalka. Dhibaatooyinkaasu haddii ay dhici lahaayeen Kacaanka ka hor, waxaa ku baabi'i lahaa boqollaal kun oo qof, dhaqaaluhuna sannado badan oo aan laga soo kabsamin buu dib u dhic lahaa.*

*Nasiib wanaag arrintaas ma dhicin sababtoo ah Golaha Sare ee Kacaanka, Ciidammada Qalabka Sida iyo gebi ahaan dadka Soomaaliyeed ayaa mar u istaagay Awoodna u yeeshay inay itaalka iyo kheyraadka waddanka oo dhan u jeediyaan, kuna habeeyaan sidii looga bixi lahaa dhibaatooyinkaas.*

*Jidka horusocodka ah ee siyaasadda dibedda ee JDS waxuu muraayad u yahay dhuuxa iyo dulucda kacaan ah siyaasaddeeda gudaha. Siyaasadda dibeddu waxay ku dhisantahay mabaadii'dii iyo qodobbadii lagu tilmaamay xaashidii koowaad ee Kacaanka. JDS dagaal aan heshiis lahayn bay ku qaadday, imberyaaliyadda, gumeysiga cusub iyo midabtakoorka, si firfircoonaan ah oo isdabajoog ah waxay taageertaa nabadkuwada-noolaanshaha dawladaha ku kala geddisan arrimaha siyaasiyadda iyo bulshada, waxay si joogta ah kor ugu dhigtaa xiriirka saaxiibtinnimada ee ay la leedahay dawladaha hantiwadaagga iyo kuwa horusocodka ah, waxay si buuxda u taageerta halganka dabaqadda shaqaalaha ee caalamiga ah; xoogagga gobannimadoonka, nabadda adduunka, horumarka iyo dimoqraadiyadda.*

*Ummadda Soomaaliyeed, ayadoo tixgelinaysa xiriirka dheer ee dhaqanka iyo Diintaba leh iyo degaanka ay la wadaagto ummadaha walaalaheeda ah ee Carbeed, waxay 1974 ku biirtay Ururka JaamicaddaCarabta.*

*Ninna ma mooga, sida dadka Soomaaliyeed ugadhiilhiyi jiray cadaadiska iyo amar ku taaglaynta lagu hayey gobollo waddammadaas ka mid ah iyo qaybta weyn ee ayagu ka qaateen xoraynta iyo horumarinta Soomaaliya, ku biiriddaasi waxay tilmaan u tahay sida aayatiinka damhbe ee dadyowgaasi meel isugu biyo shubanaayo. JDS kaalin laxaad leh ay ka qaadanaysaa xaqiijinta midnimada dadyowga Carbeed.*

*JDS waxay kale oo ka tahay xubin firficoon Ururka Qarammada Midoobay, Ururka Midowga Afrika kulanka dowladaha dhexlhexaadka iyo Ururro fara badan kana dhexeeya dawloda amaba Ururrro ijtimaaci ah. Waxay qayb door ah ka qaadatay hawlaha dawladaha dhexlhexaadka ah.*

*Sannadihii ina dhaafay JDS xiriir diblomaasi ah waxay la samaystay dalal badan oo reer Yurb, Asiya, Afrika iyo LaatiinAmeerika ah. Xiriiriyo adag oo kutaagan sinnaan, faa'iido labada dhinac ah, inaan la fara gelin ee la dhawro madaxbannaanida waddan walba ayay la samaystay dalalka hantiwadaagga ah, gaar ahaanna xiriir saaxiibtinnimo ayey Midowga Soofiyeeti la yeelatay.*

*Dhaqdhaqaaqyada siyaasadda dibedda ee ilaa hadda ay wadaan Jaallee Siyaad iyo madaxda kale ee dalku wuxuu u hawlyaraynayaa, awoodana siinayaa JDS inay ballaariso xiriirka ay la leedahay dunida dibedda, inay xoojiso magaca caalamiga ah ee ay ka dhex kasabtay dawladaha kale iyo dhaqdhaqaaqyada gobanimadoonka Afrika Aasiya iyo laatiin Ameerika.*

*Jamhuuriyadda Dimooqraadiga ee Soomaaliya waxay gashay xaga horumarkeeda iyo horukaceeda mar*

*xalad cusub oo ujeeddadeeda dambe tahay in la abuuro gogoldhigyo saldhig dhaqaaleed iyo bulshadeed si wacyi siyaasadeed, loo taaga dhisidda hantiwadaagga tiirar adag oo u horseedaya dhismaha bulsho hantiwadaag ah.*

*Isbeddelka maanta bulshada Soomaaliyeed ku socoto waa mid ka dhashay arrimo dhab ah oo aan marna iskii isaga soconayn.*

*Waxaa suuro-gelinkaraa oo qudha bisaylka, iskaashiga iyo shaqada garaadka ku fadhida ee dadweynaha, ee gebi ahaan aaminsan aragti kacaan ah, meel iyo si qudhana u dhaqaaqaya, ujeeddo qudha leh. Ma suurtowdo, mana dhici karto in la fuliyo xilkaas haddii uusan jirin urur siyaasi ah oo waddani ah, oo hanta, hirgelinaya qawaaniinta mowduuciga ah ee horukaca bulshada oo ay u muuqato ujeeddo cad, oo dareemi kara, waxna ka qaban kara danaha xoogsatada, awoodna u leh inuu iyaga abaabuulo oo kiciyo, si ay u gutaan waajibaadkii uu Kacaanku shaaca ka qaaday.*

*Ururkaas wuxuu noqon karaa oo qudha Xisbi Kacaan oo horseed ah, hubna ay u tahay aragtida hantiwadaagga ee cilmiga ku dhisan iyo waayo-aragnimada caalamiga ah ee dhismaha hantiwadaagga.*

*Iyadoo loo hoggaansan yahay fikradahaas, ayada oo muuqata in la gaaray meel kala bayr ah, iyadoo lagu shaqaynaayo ruuxi xaashida 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka waxaa Golaha Sare ee Kacaanku gaaray inay tahay lagama maarmaan in loo baahan yahay Soomaaliya in laga abuuro Xisbi Siyaasi ah oo nooca cusub ah horseedna u noqda xoogsatada iyo dhammaan xoogagga horusocodka ah ee dalka.*

*Xisbigaa nooca cusub ihi, isagoo ka duwan axsaabtii Kacaanka Oktoobar kahor jiri-jirtey Soomaaliya: xuu*

— *Wuxuu is-hordhigayaa, fulinayaana ujeeddada ah in la dhiso bulsho caddaalad, sinnaan, midnimo iyo hor-ukac ku dhisan.*

— *Waa Xisbi Kacaana oo dhaba, sababtoo ah ujeeddadiisu ma'aha inuu maamulka dalka la wareego oo keli ah ee waa inuu hirgeliyaa, muujiyaana isbeddello Kacaan ah.*

— *Wuxuu meselayaa, daafacayaana danaha dhabta ah ee dadweynaha Soomaaliyeed, gaar ahaan xoogsatada iyo xoogagga horusocodka ee dalka.*

— *Ma'aha naadi gudihiisa lagu qabanqaabiyo muranno macna darro ah, ee waa abaabulaha, barbaariyaha, kobciyaha iyo hanuuniyaha dadweynaha.*

— *Wuxuu ku shaqeeyaa oo aasaas u ah mabaadi'da caalaminimada.*

— *Wuxuu awood iyo karti u leeyahay inuu xeerarka guud ee hantiwadaagga cilmiga ku dhisan ku dabbaqo duruufta gaarka ah ee dalkan, inuu sii arko, kana fuliyo marxalad walba waajibaadka la gudboon, isla markaana sameeyo iskuna dubbarido barnaamij cilmi ku fadhiya oo taabanaaya arrimaha ka taagan Siyaasadda gudaha iyo dibedda ee dawladda.*

— *Waajibkaguud ee Xisbiga dhinaca dhaqaalaha waa tirtidda iyo ka gudubka dibudhca xagga dhaqaalaha iyo aqoonta farsamada, abuuridda saldhigga hantida ah iyo farsamada si looga dhiso Soomaaliya bulsho hantiwadaag ah.*

— *Si lagu gaadho ujeeddooyinkaas, marka ugu horlaysa waxaa loo baahan yahay. in la fuliyo arrimaha degdegga ah ee soo socda:*

— *In dawladdu si buuxda u qorshayso ilaalisona xubnaha waaweyn ee dhaqaalaha wadlanka; taasoo shardi u ah hor u dhigga iyo hoggaaminta cilmiga ku fadhida.*

— *In dhinac walba hore looga mariyo xoolaha iyo xoolo-dhaqatada oo ah lafdhabarka dhaqaalaha waddanka, meelaha daaqa, daaweynta iyo xannaanada xoolaha, in la beero nooc cusub oo tacab iyo wax soo saarid badan oo xoolo ah, in la abuuro xerooyin dawladeed iyo iskaashatooyin oo lagu xannaaneeyo xoolaha in si joogta ah dadweynaha iyo warshadahaba looga haqab-tiro intifaacooda.*

— *In kor loo qaado muuqa wax soo saaridda beeraha. Si loo fuliyo waajibkaas waxa lagama maarmaan ah in la falo dhul cusub, in la abuuro beero dawladeed iyo iskaashatooyin oo faa'iido keeni kara, in la isticmaalo farsamada beeraha ee cusub, isla markaana shaqooyinka iyo hawlaha beeruhu salka ku hayaan qalabka makiinadaha iyo isticmaalka xoogga dabka in la ballaariyo oo la badiyo waxyaalihii horee loo tacbi jirey Isla markaana la beero wax cusub, taas oo ujeeddaddu tahay in si buuxda loo ggaariiyo dadweynaha iyo warshadaha tacabka beeraha, lana abuuro kayl dawladeed oo lagaga hor tago xilliyada dhibaatooyinka iyo abaaraha; in*

*la sii fuliyo halkeedana hore looga sii wado dejinta dadka la dejinaayo, (si looga baxo reer guuraanimadii oo loogu wareego nolol ka sarraysa oo deggan), laguna abaabulo hab iskaashatooyin.*

*-- In la sii xoojiyo, horena loo mariyo qaybta dawladda ee warshadaynta (Sancada), waxay u tahay sharad asaasi ah horucaka iyo kor u qaadidda heerka dhaqaalaha waddaniga ah, dhismaha warshado cusub iyo xoojinta kuwii hore u jirey, abuuridda xubno cusub ee sancada si loo yareeyo ku xirmaanta suuqa dibeedda; in la xalliyo dhibaatada shaqa la'ida, isla markaana dadweynaha laga haqab tiro xagga badeecada loo baahan yahay ee warshadaha;*

*— In la helo hab si baahsan oo ballaaran loo gaarsiiyo biyaha dadweynaha, Xoolaha, beerah iyo warshadaha, la fidiyo horumarinta waddooyinka iyo jidalka; gaadiidka dhulka, cirka iyo badda, war is-gaarsiinta iyo raadiyaha, abuuridda idaacadda la iska arko (Television). Waa in la la dhisaa is-gaarsiin ku baahsan dalka gudihiisa oo dhan, dibeddana si karti leh ugu xirta.*

*— Xoojinta iyo badinta lacagta adag dawladdu waxay ku iman karaan haddii la kordhiyo tacabka, dawladduna xoojiso kormeerka warshadaha iyo beeraha, ganacsiga gudaha iyo dibedda, hay'adaha maaliyadda; habaysana habka canshuurta.*

*— In si habboon loogaga faa'iideysto, isticmaalana hantida gaar ahaaneed ee ka imaanaysa gudaha iyo dibeddaba xagga warshadaha, beeraha, ganacsiga iyo maamulka, haddayba fulinayso qorshaha iyo danaha dawladda; dawladduna waa inay kormeertaa, ishana ku haysaa.*

*— In la hormariyo ganacsiga dibedda, iyadoo la cuskanayo mabda'a «si isku mida uga wada faa'iideysiga» iyo sinnaanta; in kor loo dhigo alaabtii horey dibedda loogu diri jirey; in la keeno alaabta dhaqaalaha waddanku u baahan yahay.*

*— Xisbigu wuxuu daba joogaa, xaqiijinayaana in dalka laga abuuro habka caymiska ijtimaaciga ah (Social Insurance), ilaalinta caafimaadka bulshada cusub iyo horukaceeda, xagga ruuxa iyo dhismaha Jirkaba. Si lagu gaaro ujeeddadaas waxaa loo baahan yahay.*

*— In si isdaba-joog ah loogu dadaalo sidii si buuxla loo dhammays tiri lahaa daaweynta lacag la'aanta ah, oo ku imanaaysa iyadoo la dhiso cusbitaallo, dhakhtarro, cisbitaallada dhalmada iyo xannaannada hooyooyinka in la abuuro warshado waddani ah ee daawada, laga hortago, lala dagaallamo cudurrada faafa (Sinitary and epedemic service).*

*tallaabooyin laga qaado sida lagu ilaalin karo, xannaanada hooyooyinka iyo carruurta; in la abaabulo baraarujinta iyo ilaalinta caafimaadka.*

*— In loo gudbo sugidda tacliinta dugsiyada dhexe ee khasabka ah, taas oo lagu gaadhi karo in la dhiso dugsiyo, qalabkoodana loo dhammeeyo xagga alaabta, buugagga iwm.*

*— In la ballaariyo, la xoojiyana habka waxbarashada dadka waaweyn iyo dhallinyarada shaqaysa.*

*— In hore loo mariyo habka waxbarashada farsamayaqaanka ah iyo tacliinta farsamada ee gaarsiisan heerka dugsiga Sare iyo Jaamacadda, si loogu diyaariyo hawlkareenno (Kaader) farsamo-yaqaan ah, xubnaha kala duwan ee dhaqaalaha dalka.*

*— In manhajka waxbarashada lagu habeeyo horumarka dhaqaalaha, dhaqanka iyo siyaasadda ee la xiriira dhismaha hantiwadaagga.*

*— In kor loo qaado horena loo mariyo hiddaha iyo dhaqanka hantiwadaagga ah iyadoo laga faa'iideysanaayo hiddihii iyo suugaantii waddaniga ahaa ee horusocodka ahaa islamarkaana la dhuuxayo aqoonta caalamiga ah ee bulshada aadamiga ah ee muddadabadan soo tixnayd.*

*— In la dhiirigeliyo Fanka, suugaanta iyo ciyaaraha waddaniga ah ee dadweynaha.*

*— In loo abuuro saldhig adag horumarinta ciyaaraha iyo Isboortiga, taas oo waxtar weyn u leh dhallinyarada soo koreysa, kuna beeraysa ruux u ah heegan shaqada iyo daafaca dalka hooyo.*

*— In la dhammaystiro, dhinac walba lagu habeeyo habka ilaalinta iyo wanaajinta hawlgabka iyo caymiska ijtimaaciga ah ee dadweynaha.*

*DHINACA NOLOSHA SIYAASADDA XISBIGU*

*wuxuu kaalin weyn ka geysanayaa horumarinta,*

koru qaadidda iyo heer sare gaarsiinta aasaaska dimoqraadiyada ah ee bulshada hantiwadaagga, laga billaabo:

— Diyaarinta dustuur cusub;

— abuuridda iyo horumarinta hay'ado sare iyo kuwo gobollo ah ee maamulka, oo ay tahay in uu iswaafajiyo ruuxo iyo mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ku dhisan;

— Xoojinta maamulka dawladda, iyadoo lagu hanuuninayo shaqaalaha dawladda fikradaha hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, isla markaana laga abuurayo dhiig cusub oo hawlkareen ah, diyaarna u ah inay naftooda u huraan himilooyinka Kacaanka.

— Dhiirrigelinta dhaqdhaqaaqa iyo nidaamka xoogsatada iyo ku xiritaankooda hoggaaminta dawladda, dhaqaalaha waddaniga ah iyo korheer shaqada warshadaha iyo dawladda.

— DHINACA SIYAASADDA DIBEDDA XISBIGU

wuxuu ka dadaalayaa, raadinayaana inuu xaqiijiyo mabaadi'dii ku dhisany d xaashida 1aad ee Kacaanka, iyo waajibaadka taagan ee horyaalla dalka ee ay ka mid yihiin:

— Dagaalka isdaba joogga ah ee lagula jiro imberiyaaliyadda, gumesiga cusub, midabtakoolka; loogu jiro nabadda iyo si nabadeed ee wada noolaanshada dawladaha leh habab bulsho siyaasadeed oo kala duwan; loogu jiro xoojinta madaxbannaanida waddaniga ah iyo nabadgelyada caalamiga ah;

— Kaalmaynta dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka ee waddaniga ah, iskaashiga iyo halganka dadyowga Afrika si ay u gaaraan xurriyad buuxda.

— Wuxuu shaqeeyo sidii lagu dhalin lahaa isbahaysiga qaaradda Afrika, gaar ahaanna Afrikada Bari, iyadoo dhibaatooyinka dhexyaal si is-afgarad iyo nabad gelyo ah lagu dhammaynayo.

— In si ballaaran oo buuxda loo taageero halganka xaqa ah ee dadka Soomaaliyeed ee gumeysigu kala qaybiyey si ay gobannimadooda iyo midnimadoola u gaaraan.

— Si firfircooni ah looga qayb qaato hawlaha Jaamacadda dalalka Carbeed, Ururka Milowga Arfika, Ururka Qarammada Miloobey iyo Ururrada kale ee caalamiga ah.

— Horumarinta iyo xiriirka labada dhinac ama kan dhinacyada badan ee iskaashiga dawladaha Afrikaanka iyo Carabta.

— Taageerada halganka xaqa ee Ummadaha Carabta ay kula jiraan weerarka iyo cadaadiska imberiyaaliyadda iyo sahyuuniyadda, si loo xoreeyo dalalka Carabta ah ee la haysto, isla markaana la soo celiyo xuquuqdii sharciga ahayd ee Ummadda reer Falastiin.

— Xoojinta saaxiibtinnimada iyo iskaashiga JDS iyo dawladaha hantiwadaagga ah, horumarinta xiriirada lala leeyahay dawladahaas, axsaabtooda iyo ururradooda bulshada ah.

— Taageerada dabaqadda Shaqaalaha ee dalalka hantigoosadka iyo xoogagga horusocodka ee dunida.

Xisbigu wuxuu aamminsan yahay uuna garwaaqsan yahay, in heerkan cusub ee horukaca ah, Ciidammada Qalabka Sida ee JDS ay weli kaalinta hore kaga jiraan bulshada, ayna fulinayaan waajibaadka difaaca iyo dhismaha. Xisbigu fiiro gaara oo muhiim ah ayuu siinayaa xoojinta awoodda daafaca dalka, cayminta iyo ka haqabtirka Ciidammada xagga farsamada, kor u qaadidda diyaargarowga xagga dagaalka iyo siyaasadda ee Cidammada, ku barbaarinta askarta ruuxa waddaninimada, u dagaalanka fikradaha hantiwadaagga cilmiga ku dhisan iyo nafta oo loo huro dhulka hooyo.

Xisbigu si joogta ah buu uga fakaraa daafaca, iyo ilaalinta miraha iyo guulaha Kacaanka ee laga ilaalinaayo shirqoollada rajciyadda gudaha, tan dibedda iyo dadka kacaandiidka ah; uga fakaraa dhawridda nabadgelyada bulshada iyo dhammaan xoogagga gacan ka geysta horumarinta iyo ilaalinta sharciga hantiwadaagga, uga fakaraa xoojinta hay'adaha nabad sugidda, Booliska, iyo Guulwadayaasha dalka; taas oo lagu gaari karo ayadoo la wanaajiyo farsamadooda aqoontooda shaqada iyo bisaylka siyaasiga ah ee hawlkareenimada, isla markaana lagu soo buuxiyo dad. ka ugu jecel aaminsanna mabda'a Kacaanka ee ka soo dhex baxay xoogsatada.

Dhalanteed iyo riyo bay ahaan lahayd haddii loo

*qaado in xisbigoo qur ahi kari karo inuu dhiso bulsho cusub. Hantiwadaag waxaa la dhisi karaa oo keliya marka dadweynuhu raacsan yahay Xisbiga. Si loo fuliyo gebi ahaan waajibaadka dhismaha hantiwadaag ga xisbigu wuxuu cuskanayaa shaqaalaha, beeraleyda, raacatada ganacsatada yaryar, Ciidammada Qalabka Sida iyo aqoonyahannada horusocodka ah. Xoogga xisbigu wuxuu ku jiraa kuna xiran yahay sida hadba loogu xiro dadweynaha.*

*Xisbigu wuxuu hoggaaminaya dadweynaha, iyaguuna cuskadaa oo sal u ah, iyadoo uu u soo maraayo ururrada shaqaalaha, haweenka, dhallinyarada iyo kuwo kale ee ijtimaaciga ah, isla markaana si adag ayey xiriir u wada leeyihiin hay,adaha dawladda. maadaama uu yahay qaabkii u sarreeyey ee urur siyaasi ah, waxaa khasab ku ah in uu jeheeyo hawlaha ururrada ijtimaaciga ah, iyo hay'adaha dawladda. Hogaagnka siyaasiga iyo fikriga iyo abaabulidda xisbiga haddii la waayo, ama xisbigu ka soo bixiwaayo, waxaana ka lumaya waddada ay hayaan, waxay halis u noqonayaan mabaadii'da iyo siyaasadda imberyaaliyadda, waxay luminayaan feejignaanta Kacaanka ah, waxaa ku soo dhex gabbanaaya dad cadow ah.*


*Sidaa daraadeed bay qayb weyn oo muhiim ah uga noqotay hawlaha Xisbiga shaqada siyaasiga ah, taas oo ah in si joogta ah loo barto, darso, horena loogu mariyo aragtida hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, barbaarinta fikradda siyaasiga ah ee xubnaha xisbiga iyo dhammaan xoogsatada, hoggaanka siyaasiga ee tacliinta dadka, qalabka warfaafinta dadweynaha iyo baraarujinta suugaanta iyo fanka. Aaminsanaanta afkaarta hantiwadaagga cilmiga ah oo qudha ayaa xaqiijin kara ilaalinta iyo horumarinta jidka siyaasiga ah ee Xisbiga.*

*Diinta Islaamku waa caqiidada dadweynaha Soomaaliyeed ku dhaqmo, waxayna kaalin weyn ka soo qaadatay halgankii ummadda Soomaaliyeed kula jirtey gumeysiga, dulmiga iyo jahliga. Waxaa la ogsoon yahay in Diinta Islaamku ku baaqayso sinnaan, caddaalad iyo horumarka Ummadda. Iyadoo Kacaanku intaas tixgelinaayo ayuu u soo ceshay xurmadii ay mudnayd, asagoo horumarinaaya xarumaha diinta lagu barto, masaajidada, si toos ahna u hirgeliyey barashadeeda.*

*Iyadoo si qorshaysan oo habaysan loo gudanaayo fulinaayona fidinta afkaarta hantiwadaagga cilmiga ah, xisbigu wuxuu aaminsan yahay in waajibaadkiisa ay tahay inuu shaaca ka qaado, ceebeeyo. isla makraana bannaanka soo dhigo iyadoo kala qalan dulucda afkaarta imberyaaliyadda iyo dabadhilifkooda jooga Soomaaliya.*

*Si loo dhiso bulsho hantiwadaag ah waxaa qiimo gaar ahaaneed leh arrimaha diyaarinta, barbaarinta, iyo sida qumman ee hagaagsan u kala qaybinta hawlkareennada xisbiga. Arrintaas kaalin aad iyo aad u weyn oo buuxda waxaa ka qaata Machadka Culuunta Siyaasadda. Machadku waa baraarujiyaha, kobciyaha iyo diyaariyaha hawlkareennada xisbiga iyo ururrada ijtimaaciga ah, golayaasha cilmiga; waa saldhiggii Soomaaliya ka abuurayey tacliin Xisbiyeed oo qudha iyo hanuunin siyaasadeed.*

*Aayaha iyo natiijada dadaalka dadweynaha istiilka hawlkareennada marxaladaha dhow iyo kuwa damme ee horukaca Kacaanka Oktoobar wuxuu si aad ah ugu xiranyahay sida guusha leh ee loo fuliyo oo loo hirgeliyo abuuridda iyo dhisidda xisbiga siyaasiga ah ee nooca cusub, sida uu karti ugu yeesho in uu kasbado magaca iyo taageerrada xoogsatda,a sida awood uu ugu yeesho abaabulidda dhammaan dadweynaha oo ah in maskaxdiisa, aqoontiisa iyo xooggiisa lagu jeediyo in Soomaaliya laga dhiso bulsho barwaaqaysan oo hantiwadaag ah.*



# wadahadallo dhexmaray J.D.S iyo Isutagga Imaraadka Carabta

Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ahna Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo Madaxweynaha Isutagga Imaaraadka Carabta Mudane Sheekh Saayid Bin Sultaan Aal-Nahyaan waxay wada hadallo rasmi ah ku yeesheen Guriga Isutagga Imaaraadka Carabta ay ku leeyihiin Magaalada Afgooye.

Jaalle Siyaad iyo Mudane Aal-Nahyaan waxay ka wada hadleen xiriirka wanaagsan ee ka dhexeeya Soomaaliya iyo Isutagga Imaaraadka, iyo danaha labada dal sidii loo xoojin lahaa.

Madaxweynayaashu waxay kaloo ka wadahadleen arrimaha dalalka Carbta iyo amuuraha waaweyn ee haatan ka taagan dunida sidii wax looga qaban lahaa.

Jaalle Siyaad iyo Aal-Nahyaan dhammaan arrimihii ay ka wadahadleen si wanaagsan ayaa laisugu af-gartay.


Wada hadalladaasi waxaa goob joog ka ahaa dhinaca Soomaaliyeed Jaalle Sarreeye Guuto Axmed Suleymaan Cabdulle, oo ka tirsan Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, Jaalle Gaashaanle Sare Cabdi Warsame Isaaq, Wasiirka Madaxtooyada arrimaha Shaqaalaha, Jaalle Gaashaanle Sare Maxamed Cumar Jees Guddoomiyaha Hoggaanka Gaashaandhigga ee Golaha Dhexe ee Xisiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, iyo Danjiraha Soomaaliyeed, u fadhiya Isutagga Imaaraadka Carabta Jaalle Cabdinuur Cali.

Dhinaca Imaaraadkana waxaa wada hadalladaa goob joog ka ahaa Sheekh Daxnun Bin Maxamed oo ah Wakiilka Sheekha Gobolka Bari ee Imaraadda Abuu Debey, isla markaana ah Guddoomiyaha Shirkadda Batroolka ee Abuu-Dabey, Maanic Siciid Al-Cuteebi Wasiirka Batroolka iyo Macdanta, Xamuud Bin-Cali, Wasiirka Dawladda ee Arrimaha Gudaha, iyo madaxdii la socotay Madaxweynaha.

Jaalle Siyaad wuxuu guddoonsiiyey Sheekh Nahyaan Sawirka sheekha ee gacan lagu sameeyey ee Shaqaalaha Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta ay sameeyeen.

# SHEEKH SAAYID:

## — *Waxaan Arkay Dad Carbeed* —
## —— *oo Ku howlan Dhismaha* ——
## *Mustaqbalkooda*



*Madaxweynaha Isutagga Imaaraadka Carabta Sheekh Saayid Bin Suldaan Al-Nahyaan iyo Xoghayaha Guud ee XHKS isla markaana ah Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre waxay ku daawadeen gegida kubbadda cagta ee Banaadir ciyaaro isugu jira kubbadda cagta, baratan Fardood, iyo Mahrajaano.*

*Labada Madaxweyne markii ay halkaa tageen waxay salaan sharaf ah ka qaateen Guuto ka tirsan Daraawiishta Booliska, Fardooleyda Booliiska iyo Dhallinyaro ka tirsan Dugsiga Tababarka Carruurta Booliska, oo xirnaa Cigaalka uu ku caan yahay Ciidanka Daraawiishta Booliska.*

*Ciyaarahaas ka dhacay garoonka kubbaddacagta ee Banaadir waxaa kaloo u daawasho tagay Madaxweyne ku-xigeennada JDS, Jaalle Sarreeye Gaas Xuseen Kulmiye Afrax iyo Jaalle Sarreeye Guuto Ismaaciil Cali Abokor oo labaduba ka tirsan Guddiga Siyaasadda, Jaallayaal kale oo ka tirsan Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe ee XHKS, Marti sharaftii la socotay Madax-*



*weyne Isutagga Imaaraadka Carabta, Diblomaasiyiin ka soctay Safaaradaha ay dalalka Carabta iyo kuwa shisheeyuhu ku leeyihiin JDS, Saraakiil iyo Madax kale oo ka tirsan Dawladda, Dhallinyaro, Guulwadayaal, Ubaxa Kacaanka, Shaqaalaha iyo dadweyne lagu qiyaasay kumanyaal oo matilayey qaybaha kala geddisan ee uu ka kooban yahay dadweynaha ku nool magaaladda Muqdisho.*

*Madaxda iyo dadkaa ka soo qayb galay waxaa intii ay ciyaaruhu socdeen halkaa ku maaweelinayey kooxda Fannaaniinta Booliiska ee Heegan iyo Dhallinyarada Dugsiga Tabarka Carruurta Booliska oo halkaas ka tumayey heeso tilmaamaya ujeeddooyinka dhismaha XHKS, iyo sida uu Kacaanku u barbaariyey dhallinyarada.*

*Dhallinyaradaas ka socotay Dugsiga Tababarka Carruurta Booliiska waxay halkaas ku soo bandhigeen ciyaaro ay ku muujinayeen waxtarka qawmiyadda.*
*derbiyada gegida kubadda cagta ee Banaadir waxa lagu dhajiyay Masawirra da labada Madaxweyne iyadoo ay isla markaa ay halkaa surnaayeen boorar ay ku qurnaayeen ereyo muujinaya saaxiibtinnimada labada dal iyo guud ahaanba midnimada dalalka Carabta.*

*Ciyaarihii tartankii Fardaha waxa loogu kala guuleystay sida soo socota:*

*kaalinta 1aad waxa galay laba Alifle Xasan Cali oo ku tartamayey Faraska la yiraahdo Dhuuni Diid, tan 2aad waxa galay Dable Maxamed Axmed Mafuule oo ku tartamayey Faraska magaciisu yahay Siiga Cir, kaalinta 3aadna waxaa ku guuleystay Dable Cabdullaahi Maxamed oo ku baratamayey Faraska magiisa la yiraahdo Gulaamo.*

*Faraskaas kaalinta 1aad galay ee Dhuuni Diid waa markii 3aad ee uu kaalinta 1aad ka galo tartan noocaas iyadoo sannadkii 1973 - 74 uu hordhac u noqday ciyaarihii tartanka fardooleyda ee Darawiishta Booliska ee loogu dabbaaldegayey aasaaskii Ciidanka Booliska Soomaaliyeed oo la xuso 20ka bisha Diisember.*


*Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu Faraskaas ku badiyey beretnkaas Fardaha uu hadiyad ahaan u siiyey Madaxweynaha Isutagga Imaaraadka Carabta Sheekh Saayid Bin Suldaan Aal-Nahyaan.*

*Sheekh Saayid Bin Suldaan Aal-Nahyaan hadal gaaban oo uu halkaa ka jeediyey markii uu guddoomayey Faraskaas waxa uu ku tilmaamay qiimaha uu Farasku ka jooga taariikhda iyo hiddaha iyo dhaqanka Ummadda Carbeed, wuxuuna aad ugu mahadnaqay Ummadda Soomaaliyeed haddiyadaa qiimaha leh ee ay guddoonsiiyeen.*

*Ciyaartii kubbadda cagta ee dhex martay kooxaha LLPP iyo Horseed waxaa afar iyo saddex gool ku badiyey kooxda Wasaaradda Hawlaha Guud.*

*Ciyaartoyda ka tirsan labad geesood waxay halkaa ku soo bandhigeen ciyaar heerkeedu aad u sarreeyo oo si wacan isugu dubbaridnayd xag farsamo iyo xulba.*





Madaxweynaha Isutagga Imaaraadka Carabta ahna Amiirka Abuu Dabey Sheekh Saayid Bin Sultaan Aal-Nahyaan iyo wafdigii laxaadka lahaa oo uu hoggaaminaayey ayaa ka ambaxay garoonka Dayuuradaha ee Magaaladan Muqdisho kaddib markii ay u dhammaatay booqasho 11 maalmood ah oo uu ku joogay dalkan Jamhuuriya.

Sheekh Saayid iyo wafdigiisa sharafta leh waxay tageen Magaalamadaxda Dalka Siiri-Lanka ee Kolombo halkaasoo ay uga qayb geleen Shirweynaha madaxweynayaasha Dawladaha Dhexdhexaaddalka Siiri Lanka.

Sheekhu intii uu joogay dalkan Soomaaliya wuxuu wadahaddallo ku saabsan xiriirka ka dhaxeeya labada dal ee Soomaaliya iyo Immaaraadka Carabta Midoobay iyo guud ahaan arrimo dan u ah dunida Carabta la yeeshay Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuwuxuuna Sheekh Saayid booqasho ku tegey Gobolka Jubbada Hoose iyo Beelaha Danwadaagta Beeraaleyda Dujuuma iyo Sablaale.


Sheekh Saayid oo garoonka Dayuuradaha ugu warramaayey Weriyayaal ka tirsan Wasaaradda Warfaafinta daqiiqado ka hor intuusan halkaasi ka duulin wuxuu sheegay in booqashadiisu ahayd mid uu ku maraayey waddankiisii labaad, waxaana Ummadda Soomaaliyeed iyo Madaxdeedaba ugu mahadnaqayaa sidii ay ii qaabileen aniga iyo wafdigeyga waxayna ahayd mid kicisay shucuurtayda.

Madaxweynaha Isutagga Immaaraadka Carabta, Amiirka Abu Dabay, Sheekh Saayid Bin Sultaan Aal-Nahyaan wuxuu yiri: «Waxaan arkay dad Carbeed oo ku hawlan sidii ay si wacan ugu dhisi lahaayeen mustaqbalkooda». Sheekh Saayid wuxuu Ummadda Soomaaliyeed u rajeeyey inay gaaraan horumar, barwaaqo iyo Baraare iyagoo ku hiranaaya hoggaanka toosan ee Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha Soomaaliya, Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Wafdiga ka socda dalka aan walaalaha nahay waxa garoonka dayuuradaha si diiran ugu sii sagootiyey Madaxweyne Ku-Xigeennada Soomaaliya, Jaalle Sarreeye Gaas Xuseen Kulmiye Afrax, Jaalle Sarreeye Guud Maxamed Cali Samantar iyo Jaalle Axmed Suleymaan Cabdalla oo ka tirsan Gudiga Siyaasadda, Golaha Dhexe ee XHKS, Golaha Wasiirrada, Diblomaasiyiinta dalalka Carbeed iyo kuwa shisheeyaha u fadhiya dalkan Soomaaliya, Saraakiil Sare oo ka kala tirsan Ciidammada Qalabka Sida iyo Shaqaalaha Dawladda iyo dadweyne lagu qiyaasay kumanyaal oo ka socda Degmooyinka Benaadir.

Sheekh Saayid Bin Sultaan Aal-Nahyaan ka hor intuusan ka ambabixin garoonka dayuuradaha ee magaaladan Muqdisho wuxuu booqasho kal gacaltooya ah ugu tagay Xoghayaha Guud ee XHKS, ahna Madaxweynaha Jamhuuriyada Dimoqraadiga ee Soomaaliya Jaalle Maxamed Siyaad Barre. Labada Madaxweyne kulankoodaa ugu dambeeyey waxay isku dhaafsadeen erayo wacan oo shucuur walaaltinnimo leh.

# Warqad Murtiyeed ay wadajir u soo saareen J.D.S iyo Midowga Soofiyeeti




Jamhuuriyadda Dımuqraadiga ee Soomaaliya iyo Dawladda Midowga Soofiyeeti waxay wadajir u soo saareen Warqad-murtiyeed la xiriirta wada hadalladii dhowaan Mooska ay ku yeesheen wafdigii Soomaaliyeed ee uu hoggaaminayey Madaxweyne ku-xigeenka JDS, Jaalle Sarreeye Guud Maxamed Cali Samatar oo ka tirsan Guddiga Siyaasadda ee XHKS isla markaana ah Wasiirka Gaashaandhigga, iyo Taliyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo madax ka tirsan Xisbiga iyo Dawladda Midowga Soofiyeeti.

Warqad-murtiyeeddaas oo wadajir looga soo wada saaray magaalamadaxda labada dal, Muqdisho iyo Moosko, waxay sheegaysaa:

Wafdi ka socda Xisbiga iyo Dawladda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya oo uu hoggaaminayo, Xubin ka tirsan Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ahna Madaxweyne Ku-xigeenka JDS, isla markaana ah Wasiirka Gaashaandhigga, Jaalle Maxamed Cali Samatar ayaa booqasho saaxiibtinnimo oo rasmi ah ku tegay dalka Midowga Soofiyeeti bishan Agoosto 2deedii ilaa 7dii 1976».

Wafdiga Soomaaliyeed wuxuu xirmooyin ubax ah



dhigay Qabriga Aasaasihii Xisbiga Shuuciga ee Midowga Soofiyeeti iyo Dawladda Soofiyeetka V.I. Lenin iyo Daljirka Dahsoon.

Soomaaliya iyo Soofiyeetka waxa dhexmaray wada hadallo kuwaasoo ay ka qayb galeen:

Dhinaca Soofiyeetka: Xubin ka tirsan Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe ee Xisbiga Shuuciga Midowga Soofiyeeti isla markaana ah Xoghayaha Golaha Dhexe ee X.Sh.M.S, Jaalle A. P. Kirilenko, Xubin u sharraxan Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe ee XSHMS isla markaana ah Xoghayaha Golaha Dhexe ee Xisbiga SH M Soofiyeeti, Jaalle B.N. Ponomarev, Xubin ka tirsan Golaha Dhexe ee X.SH.M. Soofiyeeti isla markaana ah Guddoomiye Ku-xigeenka Golaha Wasaarada ee Midowga Soofiyeeti Jaalle I.V. Arkhipov; Xubin ka tirsan Golaha Dhexe ee X.SH.M. Soofiyeeti isla markaana ah Ku-xigeenka 1aad ee Wasiirka Arrimaha Dibedda; Jaalle V.V. Kuznetsov.

Dhinaca Soomaaliyeed Xubin ka tirsan Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe ee XHKS ahna Madaxweyne Ku-xigeenka JDS iyo Wasiirka Gaashindhigga, Jaalle Maxamed Cali Samatar; Xubin ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS isla markaana ah Guddoomiyaha Hoggaanka Culuunta Bulshada ee Golaha Dhexe XHKS, Jaalle, Axmed Maxamuud Faarax; Xubin ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS isla markaana ah Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha Dibedda ee Golaha ee XHKS, Jaalle Cabdiraxmaan Caydiid; Xubin ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS isla markaana ah Guddoomiyaha Hooggaanka Abaabulka Golaha Dhexe ee XHKS Jaalle Cumar Salaad Cilmi; Xubin ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS, Jaalle Cumar Xaaji Maxamed, Xubin ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS, Jaalle Cismaan Saalax; Danjiraha JDS u fadhiya Midowga Soofiyeeti, Jaalle Cali Xaaji Xaashi.

Wada hadalladaas oo ku dhacay jawi jaallanimo, is-afgarad iyo saaxiibtinnimo waxa laysku dhaafsaday aragtiyo iyo aaraa' ku saabsan arrimo la xiriira sii xoogaynta xiriirka ka dhexeeya Midowga Soofiyeeti iyo JDS iyo ammuuraha adduunka ka taagan oo labada dal u dan ah.

Labada dal waxay qaddarin ballaaran siiyeen xiriirka saaxiibtinnimo iyo wax wada qabsiga oo sii xoogeysanaya ee ka dhexeeya Midowga Soofiyeeti iyo Soomaaliya, kuwaas oo ku qotoma iskaashi kacaannimo oo labada dal iyo dadkoodaba.


Labada dhinac iyagoo isku aragti ah waxay caddeeyeen in heshiiskii saaxiibtinnimo iyo iskaashiga 1974kii uu fursad ballaaran u furay xoogeynta xiriirka siyaasadeed dhaqaaleed iyo dhaqaneed ee ka dhaxeeya labada dal.

Wafdiga Soomaaliyeed wuxuu ka warramay asaaskii dalka laga aasaasay Xisbiga XHKS, barnaamijka iyo dastuurka iyo horumarkii Ummadda Soomaaliyeed ay gaartay xagga dhaqaalaha iyo xagga bulshada.

Wafdiga X.SH.M. Soofiyeeti, wuxuu u riyaaqay aasaaskii XHKS, wuxuuna sheegay in Midowga Soofyeeti uu arko tallaabadan heer cusub ee muhiim ah ee uu gaaray Kacaanka Soomaaliyeed, muujinayana himilada xoogsatada Soomaaliyeed oo ay hoggaaminayaan horseedka horusocodka ah si ay u gaaraan qarannimo, xornimo iyo dhismaha bulsho hantiwadaag ah.



Dhinaca Soofiyeetku wuxuu wafdiga Soomaaliyeed uga warramay guulihii dadka Soofiyeetku uu gaaray xagga dhismaha shuucinnimada iyo tallaabooyinkii Golaha Dhexe ee X.SH.M. Soofiyeeti iyo dawladda Soofiyeetkuba ay ka qaadeen hirgelinta go'aannadii shirkii 25aad ee X.SH.M.S.



Dhinaca Soomaaliyeed aad ayuu ugu riyaaqay go'aannadii ka soo baxay shirkii 25aad ee XSHMS kuwaa soo ahmiyad weyn u leh dhismaha shuucinnimada ee dalka Midowga Soofiyeeti iyo guud ahaan adduunyada.

Markay ka hadlayeen xaaladda maanta adduunka ka taagan labada dhinac waxay caddeeyeen in adduunyada ay maalin walba maalinta ka dambeysa sii kordhayso taageerada dadyowga adduunka ay taageerayaan dhimidda xiisadaha (Detente) iyo xoogeynta mabaadi'da nabad ku wadanoolaanta ee ka dhexeysa dawladah habkooda siyaasadeed kala duwan yahay.

Waxaa si aad loo tixgeliyey iskaashiga labada dal ee arrimaha adduunka kuna saabsan u dagaallanka nabadda, nabadgelyada Ummadaha, iyo la dagaallanka imberiyaaliyadda, gumeysiga iyo midabtakoorka.

Labada dhinac waxay sheegeen inay doonayaan inay si kastaba uga qayb qaataan adkeynta iyo xoogeynta siyaasadda dhimidda xiisadaha iyo inaan la hakin isbeddelka haatan ka dhacaya xiriirka adduunweynaha, iyo tallaabada siyaasiga ee qaboojiska xiisadaha adduunka lagu xoojiyo mid militery ah. Waxay labada dhinac sheegeen inay aamminsan yihiin in qaboojinta xiisadaha adduunka ay suurta gelinayso kordhinta halganka dadyowga adduunka ay ugu jiraan xornimadooda siyaasadeed iyo bulshadeedba.

Dhinaca Soomaalida wuxuu sheegay inuu taageero buuxda siinaayo hindisaha Midowga Soofiyeeti oo ah in la helo heshiis adduunka oo idil ka dhaxeeya oo xaaraan tinnimeenaaya in lagu isticmaalo quwad si loo xalilo mashaakiilka adduunka ka taagan.

Midowga Soofiyeeti iyo JDS waxay aammiinsan yihiin in arrimaha la xiriira dhimista hubka ay tahay mushkiladda ugu weyn ee maanta adduunka hor taagan waxaynna qabaan in loo baahan yahay in dhammaan dalalka iyo dadyowga nabadda jecel ay sii xoojiyaan halgankooda ku saabsan joojinta tartanka hubka iyo kaydintiisa si bani'aadamka looga badbaadiyo dagaalka hubka halista ah.

Labada dhinac waxay caddeeyeen inay doonaayaan in dhaqsiiyo loo qabto shir adduunka oo idil ka dhexeeya oo lagaga wada hadlo dhimista hubka khatarah.


Labada dhinac waxay caddeeyeen inay ka wal wal san yihiin xaaladda ka taagan Bariga Dhexe taasoo ka



dhalatay weerarka joogtada ah oo ay Israa'iil ku hayso dadka Carabta, iyadoo ay taageersan yihiin Imberyaaliyadda Caallamiga ah.

Waxay caddeeyeen in sida keliya oo nabad waarta oo cadaalad k u dhisan lagu heli karo Bariga dhexe ay t a h a y Israa'l oo ka b a x d a dhammaan dalalka Carbeed oo ay qabsatay 1967dii iyo in

loo oggolaado xuquuqdooda Waddaniga ah dadka carbeed ee Falastiin isla markaana la ogaado inay xaq u leeyihiin inay samaystaan dowlad u gaar ah waxayna aamminsan yihiin in Shirka jineefa uu yahay waddada ku habboon oo lagu gaari karo xalligaan oo kale iyadoo laga qaybgelinayo si sinnaan ku dhisan Ururka Xoraynta Falastiin oo ah kan dhab ahaan u matalaya dadka Carbeed ee Falastiin. Labada dhinac waxay caddeeyeen inay si u wada arkaan baahida loo qabo in si degdeg ah oo loo joojiyo xabbadda ka dhacaysa Lubnaan.



Labada dhinac waxay isku raacsan yihiin in dadka ku nool Lubnaan ay iyagu xalliyaan dhibaatooyinka keenay xiisadda dalkooda ka taagan iyadoo dibedda laga soo fara gelin isla markaana la dhawro qarannimada iyo xornimada dalkaasi.

Midowga Soofiyeeti iyo JDS waxay taageersan yihiin in Badweynta Hindiya ay noqoto mid ka caagan saldhigyada millerteriga ajnabiga ah oo haatan jira gobolkaasi, iyagoo tixgelinaaya mowqifkooda ayey waxay isla soo qaadeen arrinta ku saabsan saldhigga militeriga ah oo Maraykanka ku leeyahay Diego-Garcia.


Labada dhinac waxay caddeeyeen ahmiyadda weyn ay jamciyadda Quruumaha u leedahay dhowridda nabdda iyo nabadgelyada adduunka waxaynna caddeeyeen in ay iskaashadaan si loo sii adkeeyo waxtarka hawlaheeda iyadoo lagu soconaayo xeerarka ku qoran warqadda Jamciyadda Qaruumaha.

Labada Dal Midowga S o o f i y e e t i iyo JDS waxay sheegeen inay ku dadaali doonaan sidii loo gaari lahaa heshiis ku saabsan xeerka badda oo raali gelin kara dhammaan dowladaha. Waxay caddeeyeen in loo baahan yahay in guul laga gaaro shirka Qarammada Midoobay ee xeerarka badda oo haatan ka socdo Labada dhinac waxay aamminsan yihiin . dalka New Yoork.

dhaxdhexaadka ah iyagoo ku socda siyaasadda ka soo horjeedda imberyaaliyadda iyo gumeysiga, ay kaalin weyn ka qaadan karaan halganka loo wada jiro oo loo halgamayo xornimo, gobannimo, nabadda iyo nabadgelyada adduunka shirkooda shanaad ee lagu qaban doono Colombo.

Labada dhinac waxay aaraa' iska weydaarsadeen xaaladda ka taagan Qaaradda Afrika iyo arrimaha la xiriira ciribtirka raadadkii gumeysiga iyo midabtakoorka. M. Soofiyeeti iyo JDS waxay aad ugu riyaaqeen guulaha aan kala go'a lahayn ee dadyowga Afrikaanka ah ay ka hooyeen halgankooda ay ugu jiraan gobannimada iyo horumarka bulshadeed.

Labada dhinac waxay caddeeyeen in ay taageersan yihiin halganka dadyowga Simbaabwe, Namiibiya, Jabuuti iyo Koonfur Afrika ay ugu jiraan xuquuqdooda, aayatiinkooda, xornimo iyo gobannimo waxayna sheegeen in loo baahan yahay in dhammaan dadyowga adduunka oo idil ay sii kordhiyaan taageeradooda.



Waxay isku raaceen in xiriirka nooc kasta ha noqdee ka dhexeeya Imberyaaliyadda iyo dowladaha Midabtakoorka ee Koonfurta Afrika iyo Roodiisiya loola jeedo in lagu dhiiri geliyo dawladahaasi inay sii wadaan siyaasaddooda aadannimada ka baxsan.

Iyagoo waafaqsan go'aankii ka soo baxay Golaha loo dhan yahay ee Qarammada Midoobay, labada dhinac waxay taageersan yihiin in dadka ku nool Xeebta Soomaaliyeed oo Faransiisku gumeysto (JABUUTI) la

siiyo gobannimo degdeg ah oo aan shuruud lahayn.

Labada dhinac waxay si weyn u cambaareeyeen shirqoollada imberyaaliyadda iyo rajciyadda ay ku doonayaan inay ku kala qaybiyaan dawladaha Afrikaanka ah ee xorta ah iyo in ay ku dhex abuuraan mashaakillo si ay uga weeciyaan himillooyinkooda ka soo horjeeda imbiriyaaliyadda iyo hanganka ay ugu jiraan xoreyntooda. Labada dhinac waxay sheegeen in loo baahan yahay in dhammaan dalalka ku nool Afrikada Bari ay xiriirkooda ku dhisan nabad, saaxiibtinnimo iyo deris wanaag.

Labada dhinac waxay ahmiyad weyn siinayaan xoogeynta Ururka Midowga Afrika waxaynna caddeeyeen in loo baahan yahay in Ururrada gobannimadoonka iyo dowladaha Afrikaanka ah ee xorta ah ay kordhiyaan feejignaantooda si ay uga badbaadaan tabaha rajciyadda caalamiga ah.

Labada dhinac waxay is-dhaafsadeen aaraaa' arrimaha ku saabsan dhismaha la xiriira Xisbiga, Xubnaha wafdiga Soomaaliyeed waxay si buuxda u derseen hawlaha XSHMS. Labada dhinac waxay ka hadleen ahmiyadda ay leedahay xoojinta xiriirka labada Xisbi heer kastaba si ay isku weydaarsadaan waaya-aragnimada iyo wararka danta u ah.

Labada dhinac waxay caddeeyeen inay aamminsan yihiin in booqashada wafdiga Xisbiga iyo Dawladda Soomaaliyeed ay ku joogaan Midowga Soofiyeeti iyo wadahadalladii ay sii xoojin doonaan xiriirka saaxiibtinnimada ee ka dhexeeya XSHMS iyo XHKS, labada dad ee Midowga Soofiyeeti iyo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya.

Xubin ka tirsan Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe ee XHKS, isla markaana ah Madaxweyne ku-Xigeenka JDS Jaalle Samantar wuxuu mahad diirran u celiyey madaxda XSHMS, Madaxtooyada Soofiyeetka Sare ee M. Soofiyeeti iyo Dowladda Soofiyeeti sidii diirranayd ee loo martigeliyey isaga iyo xubnaha wafdiga Soomaaliyeed intii ay joogeen Midowga Soofiyeeti.

# TUSAALOOYINKA

Mabda'a Hantiwadaagga waa Mabda'a ke liya ee ku habaysan ama ku dhisan in dadka badan la daryeelo lagana ilaaliyo kuwa yar ee iya gu dhiig-yacabka ama hantigoosadka ah ama dadka dushiisa ku noolaada.

Jaall Siyaad

# Kulankii Kolombo: Xaggee buu u Jeeday?

W.Q. Jaamac Saalax

Indhihii dadweynaha dunidu waxay eegayeen Kolombo, magaalamadaxda dalka Siri-Laanka diyaarado, duqey badan oo hoggaamiyayaal siyaasadeed ah iyo dadkii wararka fidin jireyba sida'a Kolombo ayay isugu tageen.

Maalmahaas jidadka oo idili Rooma isugu tegi meyn, laakiinse waa Kolombo halka ay ku wada dhaceen. Waxa magaaladaa lagu qabtay kulan ay leeyihiin Wasiirrada Arrimaha Dibedda ee dalalka dhexdhexaadka ah, oo u sii gogol dhigay shirweynaha shanaad ee Madaxa dalalka dhexdhexaadka ah,oo qabsoomay Agoosta 16keeda sannadkan 1976.

Qaybaha shirweynahaasi dhawr ammuurood ayaa lagu garan karaa, tirada dawladaha ka qayb galaya meesha lagu dhigaayo iyo waayaha dunida ee maanta.

*TAN TIRADA:*

Shirweynahan 5aad, waxa isugu yimid in kabadan 85 dawladood oo madaxbannaan. Haddii si kale loo sheegana qiyaastii marka dalalka madaxbannaanida haysta la isku didiyo, saddexdalool oo laba ayaa Shirweynahan ka qayb qaatay. Tusaale ahaanna shirweynihii koowaad, oo 1961kii lagu qabtay magaalada Belgaraad (Yuguslaafiya), waxa ka soo qayb galay 28 wafdi iyo goobjoogayaal, kii labaad oo 1964kii lagu dhigay Qaahira, waxa isugu yimid 56 wafdi; kii saddexaad, oo 1970kii lagu qabtay Lusaaka, (Saambiya) waxa ka soo qayb galay 63 wafdi, kii afraad, oo 1973kii lagu dhigay Jasaa'ir, waxa isugu yimid 86 wafdi. Taasina waxay muujinaysaa in shir walba kan ka sii dambeeyaa uu ka sii weynaa yacni in dalalka ku soo biirayaa halganka dhaqdhaqaaqa dhex dhexaadka ahi ay intaa isa soo tarayaan.

*TAN MESHA:*

Dalka Siiri-Laanka ee uu shirweynuhu martida u ahaa waxa uu ku yaallaa Badweynta Hindiya, oo ay imberiyaaliyadda caalamiga ahi, siiba Maraykanku ka wado dhaqdhaqaaq iyo saldhigyo la dhisaayo (Diego Garshiya, Masiira iwm). oo halis ku ah badbaadda dalalka ku socda siyaasadda madaxbannaan iyo nabadgelyada caalamiga ah dhaqdhaqaaqyadaas oo ay dabada kaga jiraan kooxaha ugu dibusocodsan Galbeedka, ee cududda aamminsan (militists), kuna lid ah, dhimista xiisadaha dunida damista dagaalka qabow iyo dhidib-u-aasidda siyaasadda nabad-ku-wada noolaanta (Peace Ful Co-existnce iyo nashuusha la'aanta (detente).

Shakina kuma uu jiro, in marba haddii shirweynahaasi ku qabsoomayo arli ka mid ah Badweynta Hindiya, oo weliba aad lid ugu ah qulquladda imberiyaaliistayaashu ka wadaan arlaa'igaa shaki kuma jiro in shirku aad u falanqayn doono arrintaa, oo uuna ka soo saari doono go'aanno la taaban karo.

*TAN XILLIGA:*

Shirweynuhu wuxuu qabsoomay xilli miisaankii xoogagga dunida wax weyni iska beddelay xilli uu habka hantiwadaagga ah ee dunidu quwad iyo maamuus weyn la soo baxay xilli nabadda caalamiga ahi tiirar adadag aasanayso arrintaas oo uu wax weyn ku sii biirshay go'aannadii shirweynihii Helsinki ee Badbaada iyo Iskaashiga Yurub, xilli laga sii baxayo dagaalkii qaboobaa ee ay afuufayeen kooxaha Galbeedka ugu dibusocodsani xilli ay guulaysteen halyeeyadii Fiyetnaam, lana abuuray Fiyatnaam mid ah oo hantiwadaag oo gardaradii imberiyaaliyaddana lagaga adkaaday Laws iyo Kamboodiya xilli gabi ahaanba gumeysigii Boortuqiiska jilbaha dhulka loo dhigay oo ay xooroobeen dadyowgii Boortuqiisku gumeysan jiray; Jimhuuri-

yadda Dadka ee Angoolana ka nabad gashay shirqoolkii imberiyaaliyadda, midab takoorka Koonfur Afrika, uur-kiraalayaasha iyo dibusocodka (taasi oo geesiyaasha Angoola ka sokow ay mahaddeeda leeyihiin dalalka beesha hantiwadaagga, siiba Midowga Soofiyeeti iyo Kuuba, iyo xoogagga horusocodka ah ee Afrika iyo dunida inteeda kaleetoba) xilli qas iyo qalaalaase dhaqaale ahi ka taagan yahay dalalka Galbeedka dhexdooda, dalalka soo korayaana ay halgan qaraar ugu jiraan madaxbannaanidooda dhaqaale.

Arrimahaasi oo idili waa dar dhiirri leh, oo saadaal u ah in shirweynaha Kolombo lagala kulmi doono guusha loo rajaynayo.

*DHEXDHEXAADNIMADU MAXAY TAHAY?*

Fikradda dhexdhexaadnimadu waxa weeye aasaaska midnimada halganka dalalka da'da yar halgankaasi oo ah mid lid ku ah gumeysiga cusub, mid ay ku baafinayaan xaqa ay u leeyihiin in ay raacaan siyaasad dibedeed oo madaxbannaan.

Jawaaharalaal Nehru, oo ka mid ahaa hoggaamiyayaalkii dhaqdhaqaaqa dhexdhexaadnimaduna waxa uu arrintaa ka yiri: «Ummadahayagan da'da yari waxa ay hiyiga ku hayaan inay si adag lugahooda isugu taagaan, oo ayna cid alla ciddii u diyaar ah la yeeshaan iskaashi loo siman yahay. Laakiinse, kuma ay camal jiraan inay cidna u noqdaan dabadhilif».

Loobo doo Nashimento, madaxa Wasaaradda ee Jamhuuriyadda Dadka ee Angoola, oo fikraddaas sii faahfaahinayeyna waxa uu yiri: «Siyaasadda dhexdhexaadnimada ahi waxa weeye sal-adag oo uu ku taagan yahay halganka liddiga ku ah imberiyaaliyadda, gumeysiga iyo midabtakoorka waxa weeye sal adag oo uu ku taagan yahay halganka loogu jiro madaxbannaanida dhabta ah».

Inkastaba erayo kala duwan ha lagu sifeeyee, siyaasadda dhexdhexaadnimada runta ahi waxa weeye in dalalka dhowaan xoroobay ay helaan siyaasad iyo dhaqaale madaxbannaan inay macaamilo loo siman yahay la yeeshaan cid alla ciddii taa u diyaar ah inay la halgamaan imberiyaaliyadda, gumeysiga, gumeysiga cusub, midabtakoorka iyo sahyuuniyadda in ay xoojiyaan halganka loogu jiro dhimista xiisadaha iyo dhaabista nabadgelyada caalamiga ah in ay xiriir fiican iyo iskaashi adag la yeeshaan dalalka beesha hantiwadaagga ah oo uu Midowga Soofiyeeti ugu horreeyo iyo gebi ahaanba xoogagga horusocodka iyo nabadda ee dunida inteeda kale.

Dawladdii tubtaa raacda, ama ugu yaraan diyaar u ah inay raacdo tubtaasi ayaa lagu sheegi karaa in ay leedhay siyaasad dhexdhexaadnimo ah oo lagu yeelan karo (positive neutralism).

*DHEXDHEXAADNIMADA YAA DIIDDAN:*

Marba haddii aan tilmaanay udub-dhexaadka siyaasadeed ee dhexdhexaadnimada, way caddahay cidda diiddan kuwa ay yihiin waxa weeye imberiyaaliistayaalka, gumeystayaalka, midabtakoorrada, sahyuuniyadda iyo gebi ahaanba dibusocodka caalamiga ah oo ay imberiyaaliyadda Maraykanku buunka u yeerinayso.

Labaataneeyo sano ka hor madaxda Maraykanka, oo uu ugu sii darnaa Joon Foster Dulles, waxa ay faquuqeen, oo si anshaxdarro ah u weerareen dalalka dhexdhexaadka ah, siyaasadda dhexdhexaadnimadana waxay ku sheegeen mid aan «akhlaaq lahayn» (immoral).

Laakiinse, siyaasaddii Dulles jab isdabajoog ah ayey u keentay madaxda Maraykanka. Buug uu 65kii qoray Prof. Sesil Karaab, oo ahaa Guddoomiyaha Laanta Cilmiga Siyaasadda ee Kulliyadda Fasar (Vassar College), buuggaas oo magiciisu ahaa: «The Elephanta and the Grass. A Study of Non-alignment», waxa uu qoraagu ku yiri, «Waayaaragtinnimada loo leeyahay dhexdhexaadnimadu waxay muujinaysaa:

1. In isku-day kasta oo uu Maraykanku isku dayaayey inuu dalalka dhexdhexaadka ah u cagajugleeyo, inuu cabsiiyo, oo u jareeyo amaba sandulle kaga dhigo in ay dhinaciisa u iishaan, ay waxba ka socon waayeen.

2. In isku daygaasi uu badanaaba la yimid natiijadii laga rabay mid ku liddi ah oo uu keenay in dalalka dhexdhexaadku wax la qabsadaan dalalka hantiwadaagga ah.

3. In Maraykanku wax kastaba ha ka qabo falasfadda dibloomaasiga ah ee dhexdhexaadnimadeed ay aydiyooloojiyadaasi tahay mid xididdo yeelatay oo taageerayaal cusub intaa soo jiidanaysa.

Haa. Siyaasadda dhexdhexaadnimadu xididdo ayey yeelatay, taageerayaal cusubna intaa waa ay soo jiidanaysaa. Waxase jirta in inkasta oo waqtigii Joon Foster Dulles iyo «dharjaallihiisii» (big stik) laga jooga muddo dheer, aanay weli qorshaha Maraykanka ka maqnayn

«siyaasaddii dharjaalluhu» (the Big Stick Policy). Tan keli ah ee is-beddeshay waxa weeye qofkii adeegsanayey iyo qaabka loo adeegsanayo.

Taa waxa ka marag ah xaashadii deelqaafka ahayd ee uu Madaxweynaha Maraykanku Jerald Foord u soo diray madaxda Afrikaanka markii ay socotay gardarradii Angoola lagu hayey waxa ka marag ah qosol-beenaadka iyo xodxodashada uu Kisinjar waday beryahanba (safarkiisii Afrika iyo kii dhowaa ee Aasiyo) waxa ka marag ah dhawaaqii ay xukuumadda Maraykanku ku dhawaaqday in aanay wax kaalmo ah siinayn dal kasta oo dawladaha soo koraya ka mid ah marba haddii dalkaa isaga ahi marka fagaarayaasha dunida la isugu yimaado uu codkiisa kala leexdo hindisaha Maraykanku wato,

Joon Foster Dulles iyo kuwii kale ee canjilaayey doorkii Jenjis Khaan waa ay tageen, waxase bedbelay Heneri Kisinjar iyo ciidankiisa, oo isla istraatiijiyadii wata, laakiinse raba inay jilaan doorkii Galaa'u Diin iyo Faynuuskiisii sixirka ahaa.

*DALALKA DHEXDHEXAADKA IYO B. HANTIWADAAGGA*

Lama dafiri karo in ay jiraan xoogag doonaya inay dalalka dhexdhexaadka ah ka fogeeyaan dalalka beesha hantiwadaagga, siiba Midowga Soofiyeeti. Taana waxa laga wadaa in dalalka soo koraaya cidla la taago, oo ay markaa noqdaan cantuugo afka loo rito. Cid kastaabase ha isdirdircisee, waayaaragtinnimada taariikhigu waxay caddaysay in Midowga Soofiyeeti iyo dalalka debiiciga ah ee dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka iyo dalalka dhexdhexaadka ah.

Midowga Soofiyeeti iyo dalalka kale ee beesha hantiwadaaggu kaal mo baaxad leh, oo hiil iyo hooba leh ayay u geystaan dalalka soo koraya. Kooxaha dibusocodka ah ee miraayadda madow wax ku eega, waxay kaalmadaa ku sheegeen inay tahay mid dan kale laga leeyahay hadiise ay jirto dan lagu leeyahay, waxa weeye in dalalka soo korayaa ay saboolnimada kaga baxaan. inay wax ku tarto sidii xididdada loogu siibi lahaa is-dhiigmiiradka sidii looga bixi lahaa ganacsiga aan sinnaantu ku jirin sidii loo heli lahaa shaqaale aqoon leh sidii dalalka soo korayaa kaalintooda uga ciyaari lahaayeen siyaasadda dunidan maanta.

Sidii ku soo aroortay guddoonnadii ugu dambeeyey ee Shirkii ay Axsaabta Shuuciga iyo kuwa Shaqaalaha ee Yurub dhowaan ku yeesheen magaalada Berliin, «Dalalka Hantiwadaagga, dhaqdhaqaaqa dalalaka dhexdhexaadka ah, xoogagga horusocodka iyo kacaanka ah ee dalalka soo koraya, dabaqadda shaqaalaha iyo dhaqdhaqaaqyada dimuqraadiga ahi waxay u dagaallamayaan in la dhiso xiriir cusub oo caalami ah saameeyana dhinacyada siyaasadda iyo dhaqaalaha, oo ku qotoma caddaalad iyo sinnaan.

Hayaanka taariikhiga ah cidina awood uma laha inay dib u celiso, mustaqbalkana waxa iska leh xiriirka saaxiibtinnimadaah iyo halriirka saaxiibtinnimada ah iyo haldaha dhexdhexaadka ah iyo dalalka beesha hantiwadaagga. Waana in taasi ay sal u noqotaa go'aannada Kolombo.

**Soomaaliya waxay gacan xoog leh ka geys atay la dagaallanka midabtakoorka iyo gumeysiga, iyadoo u arkaysa arrintaa tiir dhexaadka halganka dadyowga Afrika.**

**Jaalle Siyaad**

**Calaamadaha lagu garto qofka Hantiwada agga ah waxaa ka mid ah geesinnimo, run, daacadnimo aadaminnimo iyc xushmo.**

**Jaalle Siyaad**

# YAXYE DIYAALLO : DHISIDDA XHKS —WAA TAJRUBAD KU BIIRTAY—

# TAJRUBADAHA DHAXALGALKA AH — EE QAARADDA AFRIKA —

Waxaa soo diyaariyey Saciid CabdiSalaam



Yaxya Diyaallo waa nin qore ah una dhashay dalka Maali, kana mid ah indheergaratada Afrika ee horusocodka ah haatanna booqasho ku jooga dalkeenna.

Sharaf waxa u ah Wargeyska Xiddigta Oktoobar inuu waraysi la yeesho Jaalle Yaxya Diyaallo oo ka tirsan indheergaratada Afrika, welibana ku jira horraanka horusocodkeeda, kuwa aan marnaba ka ilbiriqsanayn, kana hakanayn halganka kharaar oy dadyowga Afrika kula jiraan imberiyaaliyadda iyo gumeysiga cusub, kuwaas aan qalinkoodu had iyo jeer fallaar ku taalla wadanaha cadowga Afrika.

Waqti qaali ahaa ayaa Wargeyskeennu uu qaar goostay waqtigii Jaalle Yaxya Diyaallo, khasabna way ku ahayd inuu noo oggolaado waqtigaas maxaa yeelay, sida aan horeyba u xusnay Jaalle Diyaallo wuxuu ka mid yahay indheergaratada Afrika aan kala bakhaylayn qaaradda Afrika aqoontiisa, aananna ka hakanayn baraarujinta dadyowgeeda, waana kuwan su'aalihii aan u jeedinnay Jaalle Diyaallo:

**Su'aal: Jaalle Diyaallo sida aan la soconno booqashadaadan JDS, waa tii labaad, haddaba, wax ma nooga taataaban kartaa wax isbeddel ah ood isleedahay waa ka muuqdaa dalka muddadii u dhexeysay booqashadaadii hore ee dalkeenna iyo middaadan haatan?**

## KACAAN SOCDA

Jawaab: Iima bannaana inaan idinku mahadiyo abaabulka aad ii abaabusheen wareysigan idinkana idiinma bannaana inaad iigu mahadisaan in aan idinka yeelo waraysigan.

Kulligeen indheergaratada Afrika halgan qura ayaan ku jirnaa, aqoon, dhiirigelin iyo hub aan qaadnaba midna waa inaannan kala bakhaylin dadyowgeenna qarniyaal badan cudur, gaajo, iyo fakhri lagu khasbay ku hoosnoolaa.

Haddii aan wax ka iraahdo isbeddelka aan tebey muddadii u dhexeysay booqashadaydii hore iyo middaydan haatan ee dalka Soomaaliya hadalkayga waxaan ku koobayaa in Soomaaliya ay socod

kacaan ah ku jirto maalin walbana ay wax cusub dhalinayso. Biyuhu hadday dureeraan aysanna meel uun iska oollin waa biyo qurxoon, hadday meel uun iska yaallaan waa kuwa midabkoodu foolxumaado urana, imaatinkaygan Soomaaliya wuxuu i taabsiiyey iaan soo dhex galay meel toon ah oo roob ku da'ay, ubaxeeda iyo dhirteedu wada udgayaan. Waxa ii caddaatay marka in Ummadda Soomaaliyeed iyo Kacaankeedu uusan marnaba hawshiisa kacaannimo hakinayn, inuu socod kacaan ah oo had iyo jeer wax cusub dhalinaya ku jiro.

Booqashadaydii hore ee Soomaaliya waxay ku soo beegantay goor loo dabbaaldegayey sannadguuradii 6aad ee Kacaankii Oktoobar ee Soomaaliya.

Waqti wuxuu ahaa dadka Soomaaliyeed ay bislaadeen. Iskama lihi hadalkaa ee waxa aan si ficil ah uga arkay shirar iyo kulanno aan ka qayb galay oy xoogsatada Soomaaliyeed kaga doodayeen arrimo, dhaqaale, bulshadeed iyo dhaqaneedba.

Waxaan ka qayb galay shirweynihii taariikhda galay ee ummadda Soomaaliyeed ee lagu qabtay Guriga Ummadda.

Meel badan oo dalkan ayaa ii suurogalay in aan booqdo, mashaariic la fuliyey ayaan arkay oo la fuliyey inkastoo dhibaatooyin fara badani ka hor imaanayeen, haddana laga adkaa sababtuna sida aan arkay waa rabidda Kacaanka ah ee dadweynaha Soomaaliyeed.

Dalkiinnan waxaan ku soo noqday goor Xisbi dhismay dadkiina ay ku dhex dhalaaleen Xisbiga. Goor Ciidammada Qalabka Sidaa ay xukunkii ku wareejiyeen dadweynaha, arrintaasoo saykoloji ahaan haddii loo eego arrin u sii xaaraysa in si dhab ah ay iskugu dhex dhalaalaan askarta iyo dadka rayidka ah ee Soomaaliyeed, sidaasoo dharbaaxadii ugu kululayd ay gaartay imberiyaaliyadda, waayo, waxay imberiyaaliyaddu, raadisaa inay kala bixiso askarta iyo dadka rayidka ah, si askartu u noqdaan aalad difaacda danaha imberiyaaliyadda iyo burjuwaasiyadda dalka ee had iyo jeer danihiisa ilaalisa.

Hadalkayga haddaan soo koobo isbeddel muuqda ayaan arkay ee dalkan isbeddel socda, welibana aan si fiican u arkay markii ay ii suurogashay in aan booqdo Gobollo, Degmooyin iyo Tuulooyinka.

**Su'aal Soomaaliyada Kacaanka ahi waxa soo food saaray dhibaatooyin fara badan ee dabeecaddu ka hor keentay, weliba goor ay dhisaysay dalkeeda xag dhaqaale, tacliin iyo dhaqanba, saasay tahayna way ka adkaatay iyadoo weliba gumeysiga cusub iyo imberiyaaliyaddu la dagaalayeen. Maxaad arrintaas ka oran lahayd?**

## ISKU KALSOONAAN

Jawaab : Shacbigu waa meesha Kacaanku ka dhasho, dhibaato kasta asagaa ka adag hadduu qof qura yahay mabd'a mid ahna leeyahay, meel qurana hayaan u yahay.

Dadka Soomaaliyeed markii ay dhibaatooyinkaas ka adkaanayeen waxay ahayd goor maskaxda laga xoreeyay, oo afkoodii la qoray, garaad siyaasadeed ee bislaadayna ay gaareen. Arrimahaasoo Kacaankii Oktoobar uu hooggaaminayey Jaalle Siyaad u horseeday la'aantoodna aysan suura gasheen in laga adkaado Ololihii Farbarashada, Kacaankii dhaqaneed oy galeen ardaydii, indheergaratada, ciidammada qalabka sida iyo shaqaaleweynaha, sabab waxay u ahaayeen guulaha iyo libaha kacaanku soo hooyey ee maanta, oy ka mid yihiin dejinta dadka reer guuraaga ah.

Libihiinna waxa sabab u ah, Kacaanka waana in la ogaadaa in Kacaanka qofka lgu dhiso, loogu-na duwo xagga shaqada iyo isku kalsoonida, arrin caynkaas ah markii meel lagu arko waxa la ogaadaa in kacaan jiro.

Shayga ugu weyn kacaan kasta waa in qofka kalsooni lagu abuuro markaasuu waxtar noqon karaa.

**Su'aal : Kacaanka Soomaaliyeed intii uu sii jiray waayo-aragnimo ayuu yeeshay, maxaa tilmaamo u gaar ah ood noo sheego kartaa ee waayo-aragnimadaas? Maxayse ka faa'iideysan karaa dadyowga Afrika?**

## JDS WAA TUSAALE

Jawaab : Dal kasta waxyaalo u gaar ah ayuu leeyahay, isla markiina waa inuusan is-moogeysiin wixii waayo-aragnimo ah ee dalalka kale, isagoo waxyaalaha u gaarka ahna tixgelinaya, iskana ilaalinaya inuu si indha la'aan ah u soo guuriyo tallaabooyin dadyowga kale qaadeen. Arrintaasoo abwaanno hore ka dardaarmeen.

Dawladaha Afrika iyo dadyowgoodu wax badan ayay ka faa'iideysan karaan dalka JDS, gaar ahaan arrimaha ku saabsan kicinta iyo hanuuninta oo lagama maarmaan u ah in dad mid ah la helo. Waxa kaloo lagaga dayan karaa isku kalsoonida iyo in iskaa wax u qabso lagu dhisi karo dal iyadoo isla markiina kaalmada hufan iyo waayo-aragnimada dalalka shishee-

yaha ahna aan la moogaaneyn.

**Su'aal : Tan iyo intii uu jiray Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu dhisayay maskaxda iyo garaadka Soomaaliyeed wuxuuna ka dadaalayey inuu garaad siyaasadeed gaarsiiyo.**

**Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waa mirihii dadaalkaas Kacaankii 21kiiOktoobar ee 1969kii ee dalkeenna. Maxaad faallo ah ood ka bixin lahayd arrintaas**

QOFKA OO LA DHISO

Jawaab : Waxaan la socdaa in dibusocodka ama kuwa indheergaratada sku sheega, hase yeeshee, Kaljar qalaad maskaxdooda ku beeran yahay inay goorihii u horraysay ee Kacaankiinna ay oranayeen waa xisbi in la abuuro, iyaga oo tusaale dalal shisheeye ka dhiganaya. Hase yeeshee, dadka noocaas ah ee maskaxdooda aan dhaqankii dalalkooda ku beereyn, fakarkooduna uu yahay fakar nin reer Yurub ah, waxa ay illoowsanaayeen illowsan yihiinna inay dalkoodii Afrika joogaan, dalalkoodii oo dibudhac sabab uu u ahaa gumeysigu ku hoos nool.

In loo baahan yahay in qofka Afrikaanka ah sare aqoontiisa loo soo qaado, in garaadkiisa siyaasadeed la dhisoo in lagu beero isku **kalsoonaan, in shaqada oo loo fool** xumeeyey loo soojeedshoo, in intaa markii la gaarsiiyo uu wax walba sameyn karo, oo ka feejignaanayo mu'aamaraadka imberiyaaliyadda iyo gumeysiga.

Muddo dheer ayaa oran jiray Kuuba maxay Xisbi la samaysan weysay, hase yeehee, dadka sidaa oranayey goortii Kacaanku dhashay horayba maa Xisbi laga dhiso, dadkii waxay ismoogeysiinayeen in guri markii la dhisayo aasaaskiisa in la dhiso ay tahy oo aan kor laga soo bilaabin dhisiddiisa.

Soomaaliyada Kacaanka ahi waxay la socotay waaya-aragnimo dalal ku degdegay dhisidda Xisbiga, **kuna fashilmay. Sidaa daraaddeed** ayay hor iyo abaato dhisidda aasaaska, dhisidda qofka, in lagu abuuro sku kalsoonaan, in loo tilmaamo goolka, in hub la siiyo goortii waxaa loo sameeyo in dhisidda Xisbigu ay tahay wax isagu iska imaanaya sida maanta dhacday.

Soomaaliya Kacaan ayay ku kacday, ciidammada qalabka sida ayaana hoggaanka u hayay, marka waxa loo baahnaa in laga dhaadhiciyo dadka maxaa ciidammadu taliska ula wareegeen, waxa loo baahnaa in Kacaanka meel la dejiyo, in dadka laga qayb geliyo haw**laha iyo xukunka. Sidaa daraaddeed** ayaa Guddiyada Ijtimaaciga ah loo sameeyey, loona dhisay Golayaasha Hanuuninta.

Waxaasoo dhan waxay ahaayeen fallaaro ku dhacay wadanha gumeysiga cusub iyo imberiyaaliyad**da oo oranayay in cadaadis millitari** uu Soomaaliya ka dhashay «dittatura militare». Tallaabooyinkaas iyo kuwo kale ayaana suura geliyey in la dhiso XHKS.

**maanta oo uu Xisbigu dhismay**na waxa hubaal u ah qofka Soomaaliyeed xorriyad iyo dimuqraadiyad, mas'uuliyad kastana wuu qaadi karaa isagoo la tixgelinayo aqoontiisa iyo kartidiisa.

Intaas ayaan ku ekeysiinnay waraysigii aan la yeelannay Jaalle Yaxya Diyaalo annagoo mar labaad ka hadli doonaa waanooyin uu u jecdiyey indheergaratada Afrika, gaar ahaanna warfidiyeennada.

## *TUSAALOOYINKA*

**Ummadda Carabta waxay uga hortagi kartaa gardarooyinka gumeysiga, xuquuqdana ku soo ceshan kartaa midnimo iyo iskaashi.**

**Jaall Siyaad**

# J.D.S. OO CAMBAAREYSAY DAGAALKII WAXASHNIMADA EE RODEESIYA

Dawladda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya waxay si buuxda u cambaareysay dagaalkii waxashnimada ahaa ee ciidammada midabtakoorka Roodiisiya ay dhowaan ku soo qaadeen dalka Jamhuuriyadda Moosaambiig», sidaa waxa sheegay war ka soo baxay Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Warkaa maanta ka soo baxay Wasaaradda Arrimaha Dibedda wuxuu u qoran yahay sida soo socota.

Dawladda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya waxay si qaraar u nacdaleysaa gardarrada qaawanayd ee ciidammada fallaagada Roodiisiya ay u geysteen waddanka Moosaambiig Arbacadii aynu soo dhaafnay ee bishan 11keeda 1976ka.

Fallaagada Roodiisiya ciidammdeeda dulinku waxay meel kaga dhaceen dawladnnimadii iyo sharafkii waddanka aan walaalaha nahay ee Moosaambiig oo dagaal gardarro oo hore loo qorsheeyey waddankaa iyo dadkiisaba loo geystay, falkaasi dugaagnimada ah waxaa ka dhashay dad badan oo naftoodu halkaa ku waayeen burbur iyo dhibaato qaraar oo loo geystay.

Dawlad ku sheegga Salisburi ee caddaanka yari ka amar taagleeyaan waxa ay ku jiraan quus iyo qalbi jab ka dhalatay ciidammada waddaniyiinta Simbaabwi oo halgankoodii milleteriga ahaa ee ay ku xoreynayeen dalkooda xorriyad dhan iyo sharaf dadka waddanka loogu soo dhicinayey aad ugu kululeeyey.

Ciidammada xorriyaddoonka ee Simhaabwi inay ku guuleysan doonaan oo ay burburiyaan fallaagada Roodiisiya waa mid lama huraan ah. Dagaalka xorriyaddoonka ee qaraaraday wuxuu ka riday baqasho iyo firkanax midab gumeystayaasha Salisbari, taasina waxay dhalisay inay sidii wax waalan ugu dhaqaaqaan dil, gardarro iyo cadaadis.

Weerarkan dambe waxa ka horreeyey weerarro la mid ah oo ay u geysteen xuduudda dalka Moosambiig oo ah dhul ay deggan yihiin dad rayid ahi ee caddaanka yar iyo xulafadooda, shaki kuma jiro inay weliba ku dhaqaaqi doonaan tallaabooyin quuseed oo cirribteedu ku qotonto dagaalka iyo halganka soo kordhaya iyo taageerada dawladda kacaanka iyo xorriyadda jecel ee Moosaambiig ay siinayso xorriyaddoonka Afrikaanka.

Inkastoo Dawladda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya ay si weyn ugu kalsoon tahay dawladda dadka ee Moosaambiig inay awood u leedahay ay gaashaanka ugu qabato weerarrada gardarrada ah ee caddaanka Roodiisiya ay u geysanayaan dalka iyo dadka Moosaambiig oo dharbaaxooyin amakaak ku rida ay geysan doonto cadawga, Dawladda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya waxay ceebeyneysaa dagaalladaasi beni'aadannimada ka soo horjeeda, waxayna ka cadsaneysaa kuwa qummaati ama qarsoodi u taageera falaagada uu madaxa u yahay Iyan Ismiit, si boolinnimo ay xukunka dalkaa ugu haystaan iyo si ay ugu kacaan dagaallada iyo burburka ay u geysanayaan, inay degdeg ugula noqdaan taageerada maamuusaanna cunaqabateyntii caalamiga ahayd ee lagula dagaallamayey burcadda Roodiisiya. Xisbiga iyo Dawladda JDS waxay ka tacsiyadeynayaan dawladda dalka Moosambiig iyagoo ugu tacsiyadeynaya mujaahidiintii ku dhintay weerarkii burcadda Roodiisiya.

Waxay weliba ugu ballanqaadeysaa dawladda iyo dadka Reer Moosaambiig ee geesiyiinta ah ee gaashaanka u haya fallaagada iyo gumeysiga taageero buuxda.

Dawladda Soomaaliya way ku garab taagan tahay dawladda dadka Moosambiig dhibaatada uga imaanaysa halganka joogtada ah ee lagu doonayo Afrika oo dhammaan xurowdo.

Inkastoo dagaalkaas xanuunkiisu uu ku dhacay dawladda aanu walaalaha nahay ee Moosaambiig, shaki kuma jiro in loola wada jeedo Qaaradda Afrika. Sidaa darteed Jamhuuriyada Dimuqraadiga ee Soomaaliya, waxay dhammaan waddammada Afrikaanka ah ka codsanaysaa inay sidaa u arkaan oo ay ka qaadaan tallaabooyinka habboon si taas oo kale aaney u dhicin aayaha dambe.

# ISKAASHIGA QALABKA WARFIDINTA EE WADDAMMADA DHEXDHEXAADKA AH

W. Q. Ibraahim Cawed (Kholi)

Mar kasta oo ay dalalka siyaasaddoodu dhexdhexaadka tahay kulmaan si ay iskaga kaashadaan arrimo, waxaa u muuqata inayan iskaashigaas hirgelin karin haddii ayan ku ladhin iskaashi kale oo saamaynaya arrimo la xiriirra iskaashiga hore. Iskaashiga dalalsiyaasaddoodu dhexdhexaadda tahay wuxuu ku bilaabmay xagga dabar-goynta gumeysiga muddo hadda laga joogo labaatemeeyo sano.

Waxaa la qirayaa in kaalmihii hiilka iyo hoogaba lahaa ee ay dalalkaasi sida joogtada ah ugu fidin jireen gobanimodoonka uu kaalin weyn ka qaatay dedejintii dabargoynta gumeysiga. Kaalintaas qaayaha leh ayaa ugu wacnayd in ay dalalka xoroobey ku soo biiraan xoogweynaha dalalka siyaasaddoodu dhexdhexaadka tahay. Hase ahaatee, dalalkaas siyaasaddoodu dhexdhexaadda tahay goor dambe ayay ku baraarugeen in gumeysigii dhoofay, laakiin uu walaashiis ka tegey. Walaashiis oo aynu ku tilmaami karro «gumeysiga cusub» ayaa u sii quminaysey gumeysiga danihiisii oo dhan. Waxaa kale oo dalalka siyaasaddoodu dhexdhexaadda tahay ku baraarugeen goor dambe inaan xornimo siyaasadeed qiime weyn lahayn haddii aan lagu ladhin mid dhaqaale. Haddii aan dadka xornimo dhaqaale la gaarsiin, halgankii khadhaadhaa iyo dhibaatooyinka laga soo mutay dagaalkii gobanimodoonku waxay noqonayaan khasaare.

Dalalkaasi waxay dhaxleen xiriir dhaqaale oo ku dhisan isku dul noolaansho iyo midiidnimo dhaqaale. Xiriirkaasi wuxuu u egyahay xiriir dawlado siman muuqaalka guud, laakiin haddii loo sii dhabba galo waa xiriir dhaqaale oo aan dheelli tirnayn. Haddaba si loodhaalli tiro xiriirkan janjeedha, waxaa lagama maarmaan noqday iskaashi dhaqaale oo dhex mara dalalka siyaasaddoodu dhexdhexaadda tahay.

Sanooyinkan dambe dalalkaasi waxay ka doodayeen sidii ay meel uga soo wada jeesan lahaayeen oo ay ugala gorgortami lahaayeen dalalka warshadaha leh sicirka alaabta ceeriin iyo tan dhammaystiran. Waxaa la isla gartay inaan iskaashi waxtar ah lagu gaari karin xagga sicirka oo la iska bahaysto keliya; waxaa la isla qiray in iskaashi joogta ah lagu gaari karo iyadoo ay dalalka siyaasaddoodu dhexdhexaadda tahay iska kaashadaan xagga ganacsiga iyo dhaqaalahaba. Waayo? Marba intii ganacsigaagu aad ugu tiirsan yahay gumeysiga warshadaha leh, waxaad halis u tahay curyaamin dhaqaale iyo xiriir doc u Janjeedha.

Hase yeeshee, si iskaashi dhaqaale, bulsho ama dhaqan looga hirgeliyo dalalka siyaasaddoodu dhexdhexaadda tahay, waxaa loo baahan yahay kala war-helid joogto ah. Si loo helo iskaashi gaadiid iyo isgaarsiin. Maadaama war-isgaarsiinta adduunku ku jirto gacanta dalalka reer galbeedka, dalalka siyaasddoodu dhexdhexaadka tahay waxaa u kala war qaada wakaaladaha wararka ee reer galbeed. daha wararka ee reer galbeed.

Intii muddo ah waxaa wada hadlayey sidii la iskaga kaashan lahaa xagga wararka. Imminka shirka Madaxweynayaasha ee Kolombo (Sri Laanka) waxaa hor yaal talooyin iskaashi. Talooyinkaas oo lagu soo dhammeeyey shirkii Wasiirrada Wararka (Delhi 8—13 Luuliyo 1976 ee dalalka siyaasaddoodu dhexdhexaadd tahay, waxaa lagu dhisay Iskaashiga la isugu Wararka Wakaaladaha.

Xeerka iskaashigaasi wuxuu dhigayaa in Gobol ahaan la isugu xidho war-isgaarsiinta. Gobol walba waxaa laga asaasayaa Xarun wararkadalalka gobolku ka kooban yahay isugu soo ururaan, dabadeed lagu faafiyo gobolka iyo gobollada kale oo u dhowba, kaddib markii la tarjumo, lana tifaftiro. Maadaama iskaashiga Wararku ku dhisan yahay mabda'a «nin-iyo-jeebki» kharajka qabashada wararka, tarjumada, tafaftiridda iyo faafintaba waxaa isu qaba dalka hawshaas Xarunta xiikeeda xambaartay. Dalalka isticmaalaya warka Iskaashiga Wararka wax lagcag ah laga qaadimaayo.

Heeshiiska Iskaashiga Wararka aad ayaa loogaga dooday shirki Delhi. Soomaaliya waxay qabtey in Iskaashiga Wararku galo kaalinta wakaaladaha wararka ee reer galbeed, haddii la rabo in si degdeg ah looga xoroobo gumeysiga xagga warisgaarsiinta. Sidaa darteed waxay soo jeedisay in la abuuro wa kaalad wararka dalalka u kala tebisa oo hawsheeda iyo kharjakeedaba la wadaago. Ra'yiga Soomaaliya wuxuu salka ku hayey mabda'a ah: «Dlalka siyaasaddoodu dhexdhexaadda tahay waa sabool, sidaa darteedna waa inay isku biiriyaan muruqooda, maalkooda iyo maskaxdoodaba si ay uga xoroobaan Wakaaladaha reer galbeed ee u kala war-xumo-tashiila.» Inkasta oo loo guuxay ra'yigan oo dalal badani taageereen misana waxa loo batay in ra'yiga hadda la hirgelin karin.

Inkasta oo uusan gaarsiisnayn sidii Soomaaliya jeclaan lahayd haddana Iskaashiga Wararku, haddii uu dhaqan galo, wax buu ka tarayaa sidii war sax ah ay u kala heli lahaayeen dalalka siyaasadooddu dhexdhexaadka tahay. Hase yeeshee, waxtarkaasi meel gaadhi maayo haddii aan Iskaashiga Wararka lagu lammaanin iskaashi gaadiid iyo mid war-isgaarsiineed. Waayo? Iskaashiyada ganacsiga iyo maaliyadda, wararka iyo dhaqanka, ama isgaarsiinta iyo gaaddiidku waa silsilad aan la kala googoyn karin. Iskaashiga waa loo hirgelin karaa tartiib, laakiin iskaashi ganacsiga kama hadli karno innagoo aan iskaashi gaadiid ku ladhin; sidaas oo kale, iskaashi isgaarsiineed. Iskaashi la'aantu waa dhibaato dhinac walba saamaynaysa oo loo baahan yahay in kulligeed la wada abbaaro iyadoo qaar degdeg loo xallinayo qaarna tartiib marba laan loo qaadayo.

# HAWEENKA SOOMAALIYEED IYO WARGEYSYADA ADDUUNKA

W. Q. Faaduma Hiired (F. Kiinya)

Mr: Graham oo haatan Soomaaliya ku jooga baaqasho waxa uu maqaalkiisaasi ku dhigay wargeys la yiraahdo «qaangaadhka debedi» oo ka faalooda arrimaha haweenka kana soo baxa carriga Ingiriiska waxa uu yiri:

Intii ka horaysey Kacaankii dalka Soomaaliyeed ka curtay Sannadkii 1969kii, haweenka Soomaaliyeed waxa quwadooda saari jireen inay ka xoroobaan adoonsiga iyo xaqiraadda lagu hayo, hase yeeshee waxa horyiil turunturooyin aad u badan oo ka dhalanaayey talisiyadii Ummadda Soomaaliyeed cidhiidhiga ku hayey, iyo dhaqanka oo dadweynaha Soomaaliyeed oo uu ka buuxay waxyaalo badan oo liddi ku ahaa horumarka iyo sinaanshaha ragga iyo haweenka.

Kuwaasi kuwa ka mid ah haddii aan soo qaadanno, Ragga Soomaaliyeed haweenka wax tala ah kama siin jirin maamulka reerka.

Raggu marka ay gabadhi u dhalato aad ayuu uga xumaan jirey marmarka qaarkoodna waxa ka suurta geli jirtey inuu furo hooyadagabadh dhasha, ayada oo dhinaca kale haddii aan u raacno aabaha iyo hooyaduba raadsan jireen inay yarad ka qaataan gabadha marka la guursado.

Dhibaatooyinka kale ee xagga dhaqanka haweenka Soomaaliyeed kala dersi jirey waxa ka mid ah gudniinka, iyo waxyaalaha la xidhiidha.

Iyada xagga xuquuqda dhaxalka haweenka Soomaaliyeed qoyska kama tirrsanayn.

Gobadha Soomaaliyeed weligeed ma lahayn wax awood ah oo ay ku gosho markhaatiga heer kasta ha la haadee ma gelijirin. Had iyo jeerna haweenayda waxay midiidin u ahayd ninka qaba, xaaladeeduna waxay ahayd midda ugu qaab daran. Dhinaca wax barashada fursad umay heli jirin, meesha keli ah lagu ogyahay waxay ahayd guriga iyo ilmaha marka ay dhasho.

Mr. Graham mar uu ka hadlaayey xagga heshiiska guurka, wa-

xa uu yiri «furitaanka haweeneyda ama burburinta reerka waxaa awoodda iska lahaa ninka oo keli ah taasi oo aanay xitaa maxkamaddu iska hortaagi karin haddii uu ninku goosto inay isaga iyo haweentu saamanka kala qaataan. «marka dalaaqada uu ninku rido waxa keli ah oo xilka saarani ahaa inuu meherkii bixiyo, ka dibna ay haweeneydii albaabka ka baxdo ayada oo aanay u soo noqonayn gabadhnimadeedii. isla marka reerkii. ay ka dhalatay kuma lahayn wax xuquuq ah, kii ay u dhexdayna ayada oo ka fara madhan ayey ka tagtay. Si ay haweenayda Soomaaliyeed uga sabata baxda in ln yiraahdo waa garoob waxay ku kallifi jirtey inay shibteeda gasho haddii uu xitaa ninku soo gelinaayo dhawr haween ah oo kale.»

Sida aan ka warqabno ayuu yiri Graham.» Soomaaliya waa dal 100 % mulsim ah kuna dhaqma diinta islaamka, una hoggaansan shuruucda iyo xaqiiqda ay diintu leedahay, Kacaanka maanta dalka Soomaaliya u talinaayana wax uu si dhakhso ah u darsay dhibaatooyinkii.

Dhibaatooyinkaasi qarniyada soo haysan jirey haweenka Soomaliyeed, waxaana uu u gondadegey kaalinta ay dalka u leeyihiin, iyo sidii loo soo noolayn lahaa. Waxa uu kacaanku isku dayey inuu baadho xaalna ka gaadho dhibaatooyinka haweenka Soomaaliyeed ka hortaagnaa inay ka qayb qaataan socodsiinta halbawlayaasha dhaqaalaha waddanka, waxa ka hortaagnaa arrimaha u diidanaa inay waxbarashada ka qaybqaataan iyada oo aanay diinta islaamku ka soo horjeedin waxbarashada iyo shaqada. Kacaanka Soomaaliyeed haddaba isaga oo arrimahaasi oo dhan tixgelnaaya ayuu qaaday tallaabooyin cad cad oo uu ku soo celinaayo xuquuqda haweenka. kuna abuuray yididiilo cusub. Mr. Graham waxa uu si gaar ahaaneed uga hadlay sida maanta haweenka iyo ragga looga mideeyey xagga shaqada, waxbarashada, mushaarka, ka qayb qaadashada ciidammada iyo shaqooyinka kala duwan ee dalka. Waxa Kacaanka Soomaaliyeed ka hor qaaday waxayaalihii hortaagnaa haweenka si aanay uga qayb qaadan dhismaha dalka, waxana uu soo saaray sharciyo gaar ah oo mamnuucaaya furidda aan maxkamaddu ka war qabin.

Mr. Graham Hankook, asaga oo ka hadlaaya arrinta shaqada waxa uu tusaale u soo qaatay Dawladda Hoose ee Muqdisho, oo uu yiri, sannadkii 169 oo dadka ka shaqaynaayey gaarayeen 1057, shan kali ah ayaa haween ahaa maantase 2089ka ruux ee ka shaqeeya waxa haween ah 286.

«Dadka aan Soomaaliya weli aragi sida runta ah kama faaloon karaan dhibaatooyinka xagga dhaqanka, caadooyinka xun-xun, iyo diin ta islaamka ah si aanay ahayn loo turjuma culayska ay ku hayaan» ayuu yiri Mr. Graham,

«Qofka si fiican u darsa taariikhdii uu Kacaanka Soomaaliya, hoggaaminayey dalka isla markaasina fursad u hela inuu yimaado Soomaaliya waxa uu garan karaa in guulaha maanta kacaanku gaadhay ay ahaayeen kuwa dhibaatooyin ballaadhani ka sokeeyeen.

Kacaanka Soomaaliyeed ee uu hoggaaminaayo Jaalle Siyaad ayuu yiri Mr. Graham waxa uu qaaday tallaabooyink asaga oo aaminsin in horumarka iyo maslaxadda caamka ahi ku jirto in ragga iyo haweenka Soomaaliyeed sinnaadaan. Runtu waxay ahayd inay dad yar oo seef la boodiyo ahi isku dayeen inay xaaladda sinaanshaha weji kale u yeelaan, hase yeeshee arrintaasi meel uma gaarin oo runteedii ayaa la arkay.

Haweenka Soomaaliyeedna waxay ka xoroobeen dhammaan dhibaatooyinkii aanay filayn inay ka bixi doonaan. Sida xaqiiqda ah go'aannada haweenka Soomaaliyeed u suurta geliyey inay maanta ka qayb qaataan guddiyada hawlaha dalka fuliya ee heer kastaba leh, waxay salka ku haysaa ayuu yiri. Graham. Khudbad ballaaran oo Madaxweynaha JDS, akhriyey san nadkii 1972 8dii Maarso, oo la xusaayey sannadguuradii haweenka adduunka. «Wax soo saaridda iyo habaynta ilmaha ee Soomaaliyeed maanta waxay ku xiran yihiin hooyada, haddaba si ay u fusho himiladeedana ah inaan abuurno bulsho hantiwadaag ahi waxay u baahan tahay xoraynta haweenayda iyo sinnaanta oo ay hesho, kana xorowdo dhammaan waxyaabaha hortaagan» ayuu yiri Mr. Graham.

W.Q Faaduma Hiireed (F. Keniya)

# Waaya-aragnimada Xisbiga Nooca Cusub ee Midowga Soofiyeeti

W. Q. Saciid Cabdisalaam

*Xisbiyada dalalka hantiwadaagga ahi si weyn ayey uga duwan yihiin xisbiyada dalalka kale ee aan hantiwadaagga ahayn, waayo xisbiyada dalalka hantiwadaagga ahi waa xisbiyo dadweyne, xisbiyo dadweynuhu maamulayo kana shaqaynaya danihiisa.*

*Haddii aynu fiiro gaar ah ku dhuganno xisbiga aabbaha u ah xisbiyada hantiwadaagga ee dunida maanta, xisbiga nooca cusub ee Midowga Soofiyeeti darasnana sida uu u maamulo dalka, waxaa hubaal ah in aynu ka dhuuxayno khibrad weyn, iyo faa'iidooyin fara badan. Xisbiga nooca cusub ah ee Midowga Soofiyeeti waxa uu u dabbaaldegay shirweynihiisii 25aad ee ahaa kii lagu qabtay magaalada Moosko, bishii febraayo 1976kii shirweynahaas oo uu ka qayb galay Madaxweynaha GSK iyo wafdi laxaad leh oo uu hoggaaminayay. Fadhiyada guud iyo shirarka xisbiyeedee ee lagu qabti warshadaha iyo hoosooyinka «SOVCOS» yada iyo «COLCOS» yada waxa lagu qabanqaabiyaa miisaaniyadaha qorshooyinka 5ta sano iyo qorshooyinka kaleba waxa ay ka doodaan mashaariicda guddiga dhexe ee X.SH.M.S ee hadba shirweynihii soo socda ee xisbiga sidii dhacday goortii soo dhowaanshihii shirwaynihii 25aad ee xisbiga waxayna soo saareen «Ducmento» (xaashi ah Tusaalaha Guud ama Hanuuninta Horumarinta Dhaqaalaha) Waddaniga ah ee sannadyada 1976-1980)» warqaddaas qiimaha weyn leh xag dhaqaale iyo xag siyaasadeedba xisbigu wuxuu dadweynaha Midowga Soofiyeeti hordhigaa wixii uu qabtay qorshihii shanta sano ee dhammaatay wuxuuna bandhigaa qormada ama borogaramka horumarinta dhaqaalaha waddaniga ah ee qorshaha la bilaabayo.*

*Shirweyne kasta oo u xisbigu yeesho wadanka soofiyeti waxa ka dhex dillaaca olole laxaad leh oo siyaasadeed shirweyne kasta ee xisbiga xukuumadda uma aha oo qura arrin weyn ee xisbigu ku kacay noloshiisana saameeyneysa ee xukuumaddu waxay qabtaa oo kale in uu yahay tallaabooyin qoto dheer oo loo tallaabsanayo horumarka dhammaan mujtamaca soofiyeetka ah iyo xagga shuuciyadda.*

*Xisbigu shirweynayaasha wuxuu kaga doodaa mirihii hoggaamintiisa, wuxuu bandhigaa wuxuu soo qabtay xagga fulinta qomooyinka «Prograammi» ee ku saabsan dhismaha heerka sare ee hantiwadaagga, wuxuu dhabbaha u xaaraa horumarinta ku xigta ee lagu horumarinayo dalka. Isu diyaarinta shirweyne kasta iyo inta hawlihiisa lagu gudo jiro waxa soo muuqda xisbigu ula yahay xoog ah abaabulaha iyo hoggaamiyaha mujtamaca hantiwadaagga ah iyo dawladda soofiyetka Mabda' wax hoggaaminta ama agaasinka xisbiga wax uu ka dhex yimaaddaa sameynta waddo siyaasadeed ee toosan cilmina ku dhisan oo waxtar iyo ku dayashaba u leh dhammaan ururada dawladda iyo kuwa bulshada midowga soofiyeeti.*

*Sidaa daraadeed ayaa shirarka xisbigu oo go'aannadiisu muujiyaa waxyaabaha baahida loo qabo oo lug ku leh horumarka bulshadeed dalka, loogama jeedo in la haqab tiro danaha waaweyn ee Soofiyetka ay shirarkaasi muhiim u yihiin. Xisbiga Midowga Soofiyeeti, asagoo kaashanaya awooddiisa siyaasadeed ee ballaaran iyo waayo aragnimadiisa xagga abaabulka, ayuu hirgeliyaa xariiqimaha guud «Linee Generali» ee dhismaha shuuciyadda ee dalka M. Soofiyeeti Xisbigu asagoo sidaa sameynaya, ahaanshaha uu yahay xoog abaabuleed umadaymo la'do mana boobo awoodda ururrada kale ee dawladda iyo kuwa bulshadeed mana xukumo ee siyaasaddiisa wuxuu ku fuliyaa isagoo kaashanaya shuuciyiinta ee ururradda ka dhex shaqeeya ee xibnahooda xisbiga ay ku leeyihiin.*

*Shirweynayaasha xisbiga Midowga Soofiyeeti qaayo weyn ayay u leeyihiin kicinta, iyo ururinta ururrada shuuciyiinta iyo dhammaan dadweynaha Soofiyetka ah, si dhab ah loogu fuliyo xilalka dalka soo food saaraya. Xisbiga Midowga Soofiyeeti waxa uu ku dhaqmaa dimuqraadiyadda bartamaha «Centaralismo Democratico» oo sharad ka dhigaysa dimuqraadiyeynta nolosha iyo dhaqdhaqaaqa xisbiga kaalina dadweynuhu uu ku leeyahay xisbiga doodaha iyo go'aannada ku saabsan dhammaan arrimaha siyaasadda istaraatejiyadeeda kuwa taasikada qabanqaabada doorashooyinka iyo dhammaan xubnaha agaasinka hoose laga billaabo ilaa kor.*

*Isla markii xisbiga shuuciga ee M. Soofiyeeti waa xisbi si adag ugu qotoma dishibiliinka dishibiliinkaas oo aan marnaba lagu xadgudbi karin, dhammaan shuuciyiintu u wada siman yihiin.*

*Kacaannimada xisbiga nooca cusub ah ee Midowgga Soofiyeeti oo ah urur dimuqraadi ah, ahna urur siyaasadeed ee dabaqadda xoogsatada ah, beeralayda «Colcos» ka iyo indheergaratada Midowga Soofiyeeti, waxa si cad looga arkaa gooraha isku diyaarinta «Preparativi» iyo inta lagu guda jiro hawlaha shirweynayaasha xisbiga shirweynayaasha xisbiga shuuciga ee Midowga Soofiyeeti meel tilmaaman, lana yaqaan ayey kaga jiraan dhaqdhaqaaqa xisbiga iyo xibnihiisa sare ee hoggaaminta.*

*«Shirweynaha xisbiga waa xubinta ugu sarreeysa ee xisbiga» sidaa ayuu ku qoray V. I. Lenin xeerkii u horreeyey ee xisbiga Midowga Soofiyeeti.*

*Qoraalkaas lenin wuxuu ka mid noqday xeerka haatan ee xisbiga shuuciga ah ee Midowga Soofiyeeti. Eraygaa V. I. Lenin waa erayga ilaa haatan sida weyn loo tixgeliyo lagana tixgeliyo dhaqdhaqaa xubin kasta ee Xisbiga oo ka mid ah xubnihiisa.*

*Sarreynta iyo haybadda xisbigu waxay tusaaleeyaan awoodiisa aan xuduud lahayn. Asaga oo Xisbigu kaashanaya kuna isticmaalaya awoodda xibnihiisa ayaa shirweynuhu wax alaale wixii dadweynaha shaqaalaha ah dani ugu jirto fuliyaa.*

# Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed

X.H.K. SOOMAALIYEED

X.H.K. SOOMAALIYEED

*----- Waa Ilaaliyaha Danaha -----*
*- Dadweynaha horusocodka ah ee -*
*----- Soomaaliyeed -----*

# TUSMO

Faallo . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 1-2

Barnaamijka XHK Soomaaliyeed . . . . . . . . . . . . . . . 3-12

Boqashadii oo uu qu yimid Sheekh Saayid JDS . . . . . . . . . . 13-16

Warqad Murtiyeed ee ay wadajir u soo saareen JDS iyo MS . . . . . . 17-21

Shirkii Kolombo ee Waddammada dhexdhexaadka . . . . . . . . 22-24

Yaxye Diyaallo: XHKS waa tajrubad ku biirtay qaaradda Afrika . . . . 25-27

JDS oo cambaareysay dagaalkii waxashnimada ee Roodeesiya . . . . . . 28

Iskaashiga qalabka warfidinta ee Waddammada dhexdhexadka ah . . . . 29-31

Waaya-aragnimada Xisbiga nooca cusub ee Midowga Soofiyeetka . . . . . 32-33

WAAGA CUSUB (NeW Era) qiimaha Sh . So. 1 midiiba

Waa Wargeys bil walba soo baxa waxaana soo saara W. W. iyo Hanuuninta Ummadad ee J.D.S.

Maamulka iyo Xfiisyada — Tel. 3057 S.B. 1178 — MUQDISHO

Dibedda waxaan ugu tala galnay afafka Ingiriisiga, Talyaaniga, iyo Carabiga

**Tifaftire Sare** (Chief Editor): Saciid Cabdisalaam.

**Kaaliye Tifaftire** (Ass. Chief Editor): Shariif Maxamed Axmed.

**Qorayaasha** (Editors): Caasha A. Maxamed, Cabdullaahi N. Magan, Saciid C. Cabdi.

**Garaacidda Liinotaybka:** Xaliimo Nuur Hilowle.

**Iskudubaridka Farsamada:** Axmed Shariif Xasan.

Waxaa lagu daabacay
Wakaaladda Madbacadda
Qaranka



# SANADGUURADII 3AAD EE G.SHAQAALAHA



# BOOQASHADII JDS EE SHEEKH SAAYID



